Qaybtani waxay sharraxaysaa faa'iidooyinka iyo adeegyada ay bixiso Molina Healthcare. Ma aha liistada dhammeystiran ee adeegyada la daboolay. Ka hubi adeeg bixiyahaaga ama nala soo xidhiidh haddii adeegga aad u baahan tahay uusan ku qorneyn. Waxaad ka eegi kartaa dheefahayaga iyo adeegyadayada bogga [MolinaHealthcare.com/WA](http://MolinaHealthcare.com/WA).

Qaar ka mid ah adeegyada daryeelka caafimaadka ee la daboolay waxay u baahan karaan oggolaansho hore. Dhammaan adeegyada aan la daboolin waxay nooga baahan yihii oggolaansho-hore. Adeegyada aan la daboolin dhexda Apple Health oo aan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo waxay u baahan yihii oggolaanshaha hore ee ka yimid HCA.

Adeegyada qaarkood waxay ku xadian yihiin tiro booqashooyin ah. Adeeg bixiyahaagu waxa uu codsan karaa Xadidka Kordhinta (LE) haddii aa du baahan tahay booqashooyin badan. Haddii aad u baahan tahay adeegyada aan la daboolin, adeeg bixiyahaagu ha codsado ka reebida sharciga (ETR).

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad hesho gudbin PCP gaaga iyo/ama ogolaanshaha hore ee Molina Healthcare ka hor inta aanad helin adeegyada qaarkood. Haddii aanad haysan gudbinta ama oggolaanshaha hore, waxaa dhici karta inaanaan bixin adeegyada. La shaqee PCP gaaga si loo hubsado inuu jiro oggolaanshaha hore ee diyaarka ah ka hor inta aanad helin adeega.

## Adeegyada guud iyo daryeelka degdega ah

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeegyada degdega ah	La heli karo 24 saacadood maalintii, todobada maalmood todobaadkii meel kasta oo Maraykanka ah.
Isbitaalka, bukaan-jiifka iyo adeegyada bukaan-socodka	Waa in aan anaga ansixiyo dhammaan daryeelka aan degdega ahayn.
Daryeelka degdega ah	Isticmaal daryeelka degdega ah marka aad qabto dhibaato caafimaad oo u baahan daryeel degdeg ah, laakiin noloshaado aanay khatar ku jirin.
Daryeelka ka hortagga	Eeg <b>Bogga 23</b>

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Daryeelka bukaan jiidka cusbitaalka (dawada jidhka)	Waa in aan ansixinaa anagu.
Tallaalka/talaalada	Xubnahayagu waxay xaq u leeyihii talaalada bixiyahooda daryeelka aasaasiga ah, farmashiyahooda ama waaxda caafimaadka xaafadooda. Ka hubi adeeg bixiyahaaga ama xubinta xidhiidhka adeegyada wixii macluumaad dheeraad aha ee qorshaynta taxanaaga tallaalka ah.  Waxaad sidoo kale booqan kartaa Waaxda Caafimaadka bogga <a href="http://doh.wa.gov/youandyourfamily/immunization">doh.wa.gov/youandyourfamily/immunization</a> wixii macluumaad dheeraad ah.
Xarun Kalkaalil oo Xirfad leh (SNF)	La daboolo xili gaaban, adeegyada caafimaad ahaan lama huraanka ah. Adeegyada dheeraadka ah waa la heli karaa. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711).

## Farmashiyaha ama warqadaha daawada

Waxaanu isticmaalnaa dawooyinka la daboolay ee loogu yeedho Apple Health Liiska Dawada La door bidayo (PDL). PDL waa liiska dawooyinka ay bixiso Molina Healthcare. Adeeg bixiyahaagu waa inuu kuu qoraa daawooyinka ku jira PDL. Waad na soo wici kartaa oo weydiisan kartaa:

- Koobiga PDL.
- Macluumaadka ku saabsan kooxda adeeg bixiyayaasha iyo farmasiyyada sameeyay PDL.
- Koobiga xeeerka sida aanu go'aanka ku gaadhnay waxay go'aamiyaan dawooyinka la daboolay.
- Sida loo waydiisto oggolaanshaha dawada aan ku jirin PDL.

Daawooyinka qaar waxa daboola Apple Health iyada oo aan lahayn qorshe daryeel la maareeyey. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) su'aalo ama si aad wax badan uga barato.

Waa inaad daawooyinkaaga ka heshaa farmashiyga shabakadeena ee adeeg bixiyaha. Tani waxay hubinaysaa in dawa qoridaada la dabooli doono. Na soo wac si aad u heshid farmasiiga kuu dhow.

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeegyada farmasiiga	Xubnuhu waa inay isticmaalaan farmasiyada ka qayb qaadanaya. Waxaan isticmaalnaa Apple Health PDL. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) liiska farmasiyada.

## Adeegyada daryeelka caafimaadka carruurta

Carruurta iyo dhalinyarada da'doodu ka yar tahay 21 sano waxay leeyihiin faa'iido daryeel caafimaad oo loo yaqaan Baarista Hore iyo Wakhtiga, ogaanshaha, iyo Daaweynta (EPSDT). EPSDT waxa ku jira adeegyo baadhish, ogaanshaha, iyo daawaynta oo dhamaystiran. Badhitaanka waxa uu ka caawin karaa aqoonsashada mida suuragalka ah ee jidhka, caafimaadka dhaqanka iyo baahiyaha daryeelka caafimaadka koriinka ee u baahan kara cudur aqoonsahso dheeraad ah iyo/ama daawaynta.

EPSDT waxaa ku jira baadhitaan kasta oo ogaanshaha iyo daawaynta lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay si loo saxo ama loo hagaajiyo xaalad caafimaad oo jireed ama dhaqanka. Tan waxa ku jira adeegyo dheeraad ah oo loo baahan yahay si loo taageero ilmaha leh daahida koriinka.

Adeegyadan waxay ujeedadoodu tahay inay ka ilaaliyaan xaaladaha inay ka sii daraan oo ay yareeyaan saamaynta dhibaatada daryeelka caafimaadka ilmaha. EPSDT waxay goor hore dhiirigalinaysaa sii wadida helitaanka daryeelka caafimaadka ee carruurta iyo dhalinyarada.

Baaritaanka 'EPSDT' waxaa mararka qaarkood loo yaqaan ilmo caafimaad qaba ama baaritaan-daryeel oo wanaagsan. Carruurta ka yar da'da 3 ee u qalma baadhitaanada ilmaha fayada qaba ee jadwalka Bright Futures EPSDT, iyo da'da ah 3-20 waxay u qalmaan baadhitaanka ilmaha fayo qabka ah jadwalka taariikhda sanad kasta. Baadhitaanka ilmaha fayo qabka waa inay ku jiraan kuwa soo socdaa:

- Taariikh caafimaad iyo koriin oo dhamaystiran.
- Baadhitaanka jidhka ah buuxa
- Waxbarashadda caafimaadka iyo la talinta ku salaysan da'da iyo taariikhda caafimaadka.
- Baadhitaanka araga.
- Baadhitaanka maqalka.

- Baadhitaanada shaybaadhka.
- Baaritaanka sunta kibriidka.
- Dib u eegista dhibaatooyinka cunida iyo seexashada.
- Baadhitaanka caafimaadka afka iyo adeegyada caafimaadka afka ee laga helo Helida Dawaynta ilkaha Ilmaha yar iyo Ikmaha (Access to Baby and Child Dentistry, ABCD) PCP u qalma.
- Tallaalada (mudditaanka).
- Baadhitaanka caafimaadka maskaxda.
- Baadhitaanka cudurada isticmaalka maandooriyaha

Marka xaalada caafimaadka uu aqoonsado adeeg bixiyaha caafimaadka ilmaha, adeegbixiyaha(yaasha) ilmahu waxay:

- Dawayn doonaan ilmaha haddii uu ku jiro qaybta adeegbixiyaha ee dawaynta; ama
- Waxay u gudbiyaan dhakhtarka takhasuska ku habboon ee daawaynta, kaas oo uu ku jiri karo baadhitaanka ama qiimaynaha takhasuska, sida:
  - Qiimaynta koriinka,
  - Caafimaadka maskaxda oo dhamaystiran,
  - Qiimaynta isticmaalka maandooriyaha, ama
  - La talinta nafaqada.
- Adeeg bixiyayaasha daawaynayaa waxay ka xidhiidhaa natijjooyinka adeegooda ee u gudbinta baadhitaanka adeeg bixiyaha(yaasha) EPSDT. Dhammaan adeegyada, ay ku jiraan kuwa aan la daboolin, ee carruurta da'aha 20 iyo ka yar waa in dib loo eegaa wixii caafimaad ahaan lama huraan ah.

Adeegyada dheeraadka ah ama taageerada:

<b>Adeega</b>	<b>Macluumaad dheeraad ah</b>
Baadhitaanka ootisamka	Loo heli karo dhammaan carruurta 18 bilood iyo 24 bilood.
Daryeelka Dawaynta Jidhka	Carruurta 20 sano da'da iyo ka yar oo uu soo gudbiyo takhtarkaaga (PCP).
Baadhiaanka Koriinka	Baaritaannada ayaa loo heli karaa dhammaan carruurta 9 bilood, 18 bilood, iyo inta u dhexeysa 24 iyo 30 bilood.
Kalkaaliyaha Waajibaadka Gaarka ah (PDN) ama Barnamijka Carruurta Caafimaad ahaan Deg-deg ah (MICP)	La daboolo carruurta da'doodu tahay 17 iyo ka yar. Waa in aan ansixinaa anagu. Dhallinyarada da'doodu tahay 18 illaa 20, tan waxaa daboola Maamulka Gabowga iyo Caawimaada Muddada-dheer (ALTSA). Eeg <b>Bogga 54</b> macluumaadka xiriirka.



## Caafimaadka dhaqanka

Adeegyada caafimaadka dhaqameed waxa ka mid ah caafimaadka maskaxda iyo jirrada adeegyada daawaynta isticmaallka maandooriyaha. Wuxaan kaa caawin karnaa helida adeeg bixiyaha haddii aad u baahan tahay la talinta, baadhitaanka, ama taageerada caafimaadka dhaqanka. Nagala soo xidhiidh 1-800-869-7165 (TTY 711) ama ka dooro bixiye buuga bixiyaha.

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Falanqaynta Dhaqanka ee la dabaqay (ABA)	Waxay ka caawisaa shaskhiyaadka qaba ootlisamka iyo naafonimada kale ee korriimada horumarinta wada xidhiidhka, xirfadaha habdhaqanka iyo bulshada.
Isticmaalka maandooriyaha (SUD) adeegyada daawaynta	<p>Adeegyada waxaa ka mid ahaan kara:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qiimaynta</li> <li>• Wax ka qabadka kooban iyo u gudbinta daaweyn</li> <li>• Shakhsii qoys, iyo kooxda daawaynta</li> <li>• Bukaan socod, hoy, iyo bukaan jiif</li> <li>• Adeegyada daaweynta beddelidda Opiate (Afifyoonka)</li> <li>• Maareynta kiiska</li> <li>• Taageerada filka</li> <li>• Adeegyada dhibta</li> <li>• Maareynta ka noqoshada (ka-saarista sunta)</li> </ul>
Daaweynta caafimaadka maskaxda	<p>Adeegyada caafimaadka maskaxda waa la daboolayaa marka ay bixiyaan dhakhtarka dhimirka, cilmi nafsiiga, la taliyaha caafimaadka dhimirka ee rukhsada haysta, shaqaale bulsheed oo rukhsa leh, ama guur rukhsad daysan iyo dhaqtarka qoyska oo rukhsad leh. Adeegyada caafimaadka dhimirka waxaa ka mid noqon kara:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qiimaynta qaadashada, qiimaynta, iyo baadhista</li> <li>• Taageerada filka</li> <li>• Daawaynta wax ka qabadka caafimaadka maskaxda sida: <ul style="list-style-type: none"> <li>◦ Shakhsii qoys, iyo kooxda daawaynta</li> <li>◦ Bukaan socod, hoy, iyo bukaan jiif</li> <li>◦ Qaababka daawaynta degdega ah iyo kuwa kooban</li> </ul> </li> <li>• Adeegyada dhibta</li> <li>• Maamulka dawada iyo ka warhaynta</li> <li>• Isku xidhka daryeelka iyo is dhexgalka bulshada</li> </ul>

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Dawooyinka cudurada ay Keenaan Oobiyeedku (MOUD)	Hore loogu tixraacay sida Dawaynta Dowo ahaan La kaalmeeyo (MAT). Daawooyinka loo isticmaalo in lagu daaweyo cudurada isticmaalka maandooriyaha. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) faahfaahin gaar ah.
Wax ka qabadka Daawaynta Dhibaatooyinka Khamaarka	Adeega daboolan waxaa ka mid ah: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qiimaynta</li> <li>• Daawaynta shakhsiga, qoyska iyo/ama adeegyada kooxda</li> </ul>

Washington State Family Youth System Partner Round Tables (FYSPRTs) waxay bixisaa madasha qoysaska, dhalin yarada, nidaamyada, iyo bulshooyinka si loo xoojiyo ilaha waara ee bixinta hababka bulshadda ku salaysan si wax looga qabto baahiyaha caafimaadka dhaqanka ee carruurta, dhalin yarada, iyo qoysaska.

Booqo shabakada Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) wixii macluumaad dheeraad ah: [hca.wa.gov/about-hca/programs-and-initiatives/behavioral-health-and-recovery/family-youth-system-partner-round-table-fysprt](http://hca.wa.gov/about-hca/programs-and-initiatives/behavioral-health-and-recovery/family-youth-system-partner-round-table-fysprt).

Ka sakow adeegyada Caafimaadka dhaqanka ay daboosho Apple Health, Molina Healthcare waxay leedahay Sanduuqa Maaliyada Gobolka Guud (GFS) maaliyada loo isticmaali karo xubnaha marka adeega aanu daboolin Apple Health. Helitaanka maaliyadan lama damaana qaado, oo marka ay dhammato adeegyada la xidhiidha lama heli karo. Health Care Authority (HCA) ayaa doortay isticmaalka mudnaanta leh ee maaliyadan, kuwaas oo ay tahay in ay buuxiyaan baahida caafimaad oo uu codsado bixiye qandaraas leh sida waafaqsan siyaasadaha Molina Healthcare. Maalliyada GFS waxaa loo isticmaali karaa adeegyada soo socda haddii maaliyada la heli karo. Adeegyada ahmiyada u sareeya waxaa ku jira:

- Iisticmaalka maandooriyaha (SUD) adeegyada daawaynta
- Daryeelka Shakhsi ahaaneed ee Caafimaadka Dhaqanka
- Adeegyada deegaanka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn: Qolka iyo cuntadda gudaha goobta weecinta cusbitaalka, jirada isticmaalka maandooriyaha iyo goobta lagu dabibbo caafimaadka maskaxda ama qiimaynta madaxa banaan iyo Xarumaha Daawaynta.
- Daaweynta Xoogan Sare, oo ay ku jiraan adeegyada iyo taageerada Barnaamijka aan Medicaid ahayn ee Daawaynta Bulshada Xaqijinta (Program of Assertive Community Treatment, PACT)
- Baadhida Kaadida
- Wax ka qabadka daweynta ee carruurta
- Adeegyada dadka sakhraansan la siiyo
- Daryelida Maaraynta Kiiska

Fadlan weydii adeeg bixiyahaaga haddii adeegyo dheeraad ah la bixin karo (haddii ilo la heli karo).

## Nafaqada

Adeega	Maclumaad dheeraad ah
Daaweynta nafaqada caafimaadka	<p>Waxaa la daboolay macaamiisha da'doodu tahay 20 sanadood iyo ka yar markay caafimaad ahaan lagama maarmaan tahay oo uu soo gudbiyo adeeg bixiyahu ka dib baadhitaanka EPSDT.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Waxaa ku jira daawaynta nafaqada, qiimaynta nafaqada, iyo la talinta xaaladaha ku jira qaybta rugta ee khabiirka cuntada diiwaanka gashan (RD) si oo qiimeeyo oo loo daweeyo.</li> </ul>
Nafaqaynta gudaha & dibada xidmaha ah	Kaabida naqada laga qaato dibada xidmaha iyo saadka dhammaan dadka ka diiwaan gashan Nafaqada caloosha laga qaato iyo saadka dhammaan da'aha tuumbo-lagquudiyo dadka ka diiwana gashan. Alaabta nafaqa ka qaadashada afka ee macaamiishka 20 sanadood jirka ah iyo ka yar ee wakhtiga xadidan si wax looga qabto jirada daran.

## Baahiyaha daryeelka caafimaad ee gaarka ah ama xanuunka daba dheeraad.

Waxa laga yaabaa inaad u qalanto adeegyo dheeraad ah dhexda barnaamijkayaga Guriga Caafimaadka ama adeegyada isku xidhka daryeelka haddii aad qabto baahiyoo daryeel caafimaad oo gaar ah ama jirro wakhti dheer ah. Tan waxa ku jiri kara helida tooska ah ee dhakhtarada takhsuska. Xaaladaha qaark, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad u isticmaasho dhakhtarkaaga takhasuska sidii PCP. Na soo wac wixii maclumaad dheeraada ah ee ku saabsan isku xidhka daryeelka iyo maaraynta kiiska.

## Daawaynta

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Daryeelka bukaan socodka (daawaynta, jidhka, iyo daawaynta haddalka)	<p>Tani waa dheef xadidan. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) faahfaahin gaar ah. Xaddidaaduhu waxaa la adeegsan karaa haddii lagu sameeyay mid ka mid ah goobaha soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Rugta bukaan-socodka</li> <li>• Isbitaalka bukaan-socodka</li> <li>• Guriga wakaalada caafimaadka guriga Medicare ansixiya marka la siinayo carruurta 20 sano da'da iyo ka yar oo ku jira xarunta horumarinta neerfaha ee la ansixiyay. Arag: <a href="http://doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/970-199-NDCLList.pdf">doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/970-199-NDCLList.pdf</a></li> </ul>
Adeegyada daawaynta	<p>Adeegyada daryeelka caafimaadku waxay kaa caawin karaan inaad ilaaliso, barato, ama horumariso xirfadaha iyo shaqaynta nolosha maalinlaha aha ee aan la helin iyaddoo ay sababtay waxyabo lagu dhashay, hidda sidaha, ama xaaldaha caafimaadka hore loo helay. Tani waa dheef xadidan. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) faahfaahin gaar ah.</p> <p>Xaddidaaduhu waxaa la adeegsan karaa haddii lagu sameeyay mid ka mid ah goobaha soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Rugta bukaan-socodka</li> <li>• Isbitaalka bukaan-socodka</li> <li>• Guriga wakaalada caafimaadka guriga Medicare ansixiyay marka la siinayo carruurta 20 sano da'da iyo ka yar oo ku jira xarunta horumarinta neerfaha ee la ansixiyay. Arag: <a href="http://doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/970-199-NDCLList.pdf">doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/970-199-NDCLList.pdf</a></li> </ul>

## Qaybta takhasuska

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Walaxda difaaca jidhka (Nooca daawaynta Xasaasiyada)	Tallaalka xasaasiyadda.
Qaliinka caloosha si miisaanka loo dhimo	Oggolaansho hor udhac ayaa looga baahan yahay qalliinka buurnida. Kaliya waxaa laga heli karaa Xarumaha Heerka Sare ee HCA ogolaatay (COE).
Habka Daaweynta dib ushaqaynta jirka	Ku xadidan shuruudaha qorshaha
Ku dawaynta kimiko kansarka	Adeegyada qaarkood waxay u baahan karaan ogolaansho hore.
Qalliinka qurxinta	Kaliya marka qalliinka iyo adeegyada iyo saadka la xidhiidha la bixiyo si loo saxo ceebaha jidheed ee kayimid dhalashada, jirada, jugta jidhka gaadhay, ama naas jarida sib u dhiskeeda wixii ah daawaynta kansarka ka dib.
Saadka cudurka sonkorta	Agab xadidan oo la heli karo iyada oo aan horay loo ansixin. Saadk dheeraad ah oo la heli karo iyadoo wadata ogolaanshaha hore.
Maydhida kelyaha	Adeegyadan waxay u baahan karaan oggolaansho hore.
Daaweynta Cagaarshowga C	Adeeg bixiye kasta oo rugsad u hsaynta qorada dawooynika dooska u shaqaynaysa ee ku lidka fayrasks waa la oggol yahay si loo baadho oo loo daweeyo xubnaha Apple Health. Tan waxaa ka mid ah adeeg bixiyayaasha daryeelka koowaad, xarumahu daawaynta isticmaalka maandooriyaha, iyo kuwa kale. Daawooynika qaar Cagaarshowga C waxa daboola Apple Health iyada oo aan lahayn qorshe daryeel la maareeyey. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) si aad wax badan u barato.
Ku beeruda Xubnaha	Qaar ka mid ah xubin ku beerida waxaa daboosha Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) faahfaahin gaar ah.

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeegyada Oksijiinka iyo Neef mareenka	Ogsajiinta caafimaad ahaan lama horaanka ah iyo/ama qalabka daawaynta neefsashada, saadka, iyo adeegyada kuwa diiwaanka gashan ee u qalma.
Daawaynta cagaha	Tani waa dheef xadidan. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) xog gaar ah.
Sigaar Joojinta	Waxaa loo daboolay dhammaan macaamiisha haysta ama aan haysan soo gudbinta PCP ama ogolaansho hore. Wac Waaxda Maareynta Caafimaadka si aad wax ugaogaato <b>Molina My Health – Barnaamijka Joojinta Tubaakada</b> (866) 891-2320 (TTY 711).
Adeegyada Transhealth	Adeegyada la xidhiidha transhealth iyo daaweynta qofka sifadiisa sinji kala duwan tahay waxaa ka mid ah daaweynta beddelka hoormoonka, daaweynta xakamaynta baaluqnimada, iyo adeegyada caafimaadka dhimirka. Adeegyadan waxay u baahan karaan oggolaansho hore.
Baadhitaanka Curudka qaaxada (TB) iyo la socodka ah	Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad u tagto PCP gaaga ama waaxda caafimaadka deegaankaaga.

## Maqal iyo aragtí

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Baadhitaanada maqalka	Baadhitaanka maqalka.
Qalabyada lagu rakibo lafta dhagta ee Caawiya Maqlka (BAHA)	Qalabka labbada ah ee gudaha dhegta maqal ahaan loo geliyo, oo ay ku jiraan qalabka la geliyo, qaybaha, aaladaha qalabka, baytariyada, jaarjarada, iyo dib u samaynta dheefta loo daboolo dhammaan shakhxiyaadka.  BAHA, ay ku jirto qalabyada BAHA (labbadaba qaliin ahaan la geliyo iyo sameecadaha jilicsan ee madaxa lagu xidho), beddelka qaybaha, iyo baytariyada waa dheefta carruurta 20 sanadood jirka iyo ka yar.

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Baadhitaanka indhaha & ookiyaalaha	<p>Waa inaad isticmaashaa shabakadayada adeeg bixiyaha. Na soo wacwixii ah macluumaadka dheefta. Carruurta 20 sanadood jirka ah iyo ka yar, muraayadaha indhaha iyo qalabka lagu beddolo waa la daboolaa. Waxaad ka heli kartaa qaybiyayaasha muraayada bogga: <a href="https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/">https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/</a></p> <p>Dadka waa wayn ee u baahan muraayadaha indhaha kharashka la yareeyay waxaad ka iibsan kartaa fareemada muraayadaha iyo muraayada wiilka lagu dhegjiyo dhexda adeeg bixiyayaasha ka qayb agalaya ee indhaha. Ka hel liiska adeeg bixiyayaasha ka qayb galaya: <a href="https://hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf">hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf</a></p> <p>Molina waxay siisaa xubnaha, da'doodu tahay 21+, muraayadaha indhaha oo aan wax kharash ah kaaga bixin Zenni Eyewear! Ka baadh in ka badan 55 qaab onlayn ah, oo ay ku jiraan muraayadaha bifocal iyo horumarka. Markaas isugu day dhab ahaan. Muraayadahaaga ayaa loo samayn doonaa dalabka iyo u soo dirida toos ilaa albaabkaaga. Wax badan ka baro <a href="https://MolinaHealthcare.com/memberWA">MolinaHealthcare.com/memberWA</a>.</p>
Baadhitaanada maqalka iyo qalabka kaalmada maqalka	<p>Baadhitaanadu waa dheef la daboolo dhammaan shakhsiyaadka</p> <p>Qalabka kaalmada maqalka waa loo heli karaa:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Carruurta 20 iyo ka yar</li> <li>• Dadka waaweyn ee buuxiya shuruudaha barnaamijka</li> </ul> <p>Kaalmada maqalka hal dheg ah waxaa ku jira:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Leekaysiinta</li> <li>• La socodka</li> <li>• Baytariyada</li> </ul>

## Qorshaynta qoyska / caafimaadka taranka

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeegyada Qorshaynta Qoyska oo ku jiraan dawo qorida iyo xakamaynta uurka iyaddoon la qorin la iibsado, dawada ka hortagga uurka, iyo ka hortagga uurka degdega ah (Qorshaha B)	Waxaad adeegsan kartaa shabakadeena adeeg bixiyaasha, ama waxaad aadi kartaa waaxdaada caafimaadka ama rugta qorshaynta qoyska.
Baadhitaanka HIV/AIDS	Waxaad haystaa doroashada tegida rugta qorshaynta qoyska, waaxda caafimaadka maxaliga ah, ama PCP gaaga wixii baadhitaan ah/
Daboolida Uurka Ka dib (APC)	Haddii aad ka diiwaan gashan tahay daboolida Apple Health oo aad uur leedahay, waxaad heli kartaa ilaa 12 bilood oo daboolida dhalmada ka dib marka uurkaagu dhammaado. Wax badan ka baro <a href="http://hca.wa.gov/apc">hca.wa.gov/apc</a> .

## Qalabka iyo agabka caafimaadka

Waxaan daboolnaa qalabka ama saadka marka ay caafimaad ahaan lagama maarmaan u yihiin oo uu kuu qoro adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadku. Waa in aan horay u ansixinnaa inta badan qalabka iyo saadka ka hor inta aanaan bixin kharashkooda. Na soo wac wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qalabka caafimaadka iyo saadka la daboolo.

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Qalabka caafimaadka	Qalabka badankoodu waa inay helaan oggolaansho hore. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) faahfaahin gaar ah.
Agabka caafimaadka	Agabka badankoodu waa inay helaan oggolaansho hore. Naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) faahfaahin gaar ah.

## Shaybaadhka iyo raajada

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeega shucaaca iyo sawirka caafimaadka	Adeegyada qaarkood waxay u baahan karaan ogolaansho hore.
Adeegyada shaybaadhka iyo raajada	<p>Adeegyada qaarkood waxay u baahan karaan ogolaansho hore.</p> <p>Xadidnaanta hoos lagu muujiyyay waxaa loogu talo galay adeegyada cudur baadhita bukaan socodka oo keliya:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Baadhita maandooriyaha keliya marka caafimaad ahaan ay lama huraan tahay iyo:           <ul style="list-style-type: none"> <li>◦ Uu dalbaday dhakhtarku sidii qayb qiimaynta caafimaadka; ama</li> <li>◦ Baadhida isticmaalka maandooriyaha loo baahan yahay si loo qiimeeyo ku habbhoonaanta baadhitaanada caafimaadka iyo daawaynta.</li> </ul> </li> </ul> <p>Adeegyada raajada la qaadi karo ee la dhigay gudaha guriga qofka is diiwaan gelinaya ama xarunta kalkaaliska waxay ku xadidan yihiin filimada aan ku lug lahayn isticmaalka waxyaabaha jidhka raajada loo mariyo.</p>

## Caafimaadka dumarka iyo umusha

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Bamka naaska	Noocyada qaarkood waxay u baahan karaan oggolaansho hore.
Adeegyada Dhalmada ee Haweenka	<ul style="list-style-type: none"> <li>Daryeelka dhalmada ka hor: booqashooyinka joogtada ah ee xafiiska iyo adeegyada la xidhiidha ee ka yimid doorashada adeeg bixiyahaaga.</li> <li>Cusbitaalka ku umulida, xarunta dhalmada, ama ku dhalida guriga. La hadal adeeg bixiyahaaga umulida si aad u go'aamiso waxa ikhtiyaarka umulinta kuugu fiican adiga kuu yahay.</li> <li>Umulida ay bixiso umuliso ruqsad haysata, kalkaaliso umuliso ah ama dhakhtar.</li> <li>12 bilood daryeelka dhalmada ka dib ee dhammayska tiran ee daryeelka dhalmada.</li> <li>Hal sano oo daryeel caafimaad ee dhallaanka.</li> <li>Ka qudinta xabadka - La-talinta nuujinta.</li> </ul>
Daryeelka caafimaadka haweenka	Adeegyada daryeelka caafimaadka caadiga ah iyo kahortaga, sida daryeelka hooyada iyo daryeelka dhalmada ka hor, raajada naasaha, caafimaadka taranka,baaritaanka guud, adeegyada kahortaga uurka,baaritaanka iyo daaweynta cudurada galmaada lagu kala qaado, iyo naas nuujinta.

## Adeegyada dheeraadka ah ee aanu bixino



### Molina Help Finder

Ilaha caawimo raadinta ee adeegyada sida guriyeenta, tababarka shaqada, gaadiidka, waxbarashada iyo wax ka badan. Booqo [MolinaHelpFinder.com](https://MolinaHelpFinder.com).



### Khadka Talo-bixinta Kalkaalisada ee 24-Saacadood

Wac wakhti kasta, maalin ama habeen, si aad ula hadasho kalkaalisada diiwaanka gashan.

- 1-888-275-8750 Ingiriisi iyo luqado kale
- TTY 711 Dhagool iyo maqal adag



### Text4baby

Waxaad kooto u samaysan kartaa wixii ah fariimaha qoraalka ah ee bilaashka ah ee ku saabsan daryeelka dhalmada ka hor, caafimaadka ilmaha, korinta ilmahaaga iyo wax badan oo kale. Kooto samayso addo friin u soo diraya "BABY" u diraya 511411 ama gal [text4baby.org](https://text4baby.org). Qiimaha telefoonka gacanta iyo isticmaalka internatka ayaa la adeegsadaa.



### 90-maalmood oo dib-u-buuxinta daawada

Wakhti kaydi adiga oo hela 90-maalmood oo dib-u-buuxinta xulashada daawooyinka xiliga-dheer.



### DentistLink

Ku xidhnow dhakhtarka ilkaha ee maxaliga ah kaas oo aqbala caymiska Apple Health bogga [dentistlink.org](https://dentistlink.org).

*Ilahan waxaa heli kara dhammaan xubnaha Apple Health ee gobolka Washington.*



## Barnaamijyada Maareynta Caafimaadka

Molina Healthcare waxay bixisaa barnaamijyo kaa caawinaya adiga iyo qoyskaaga inaad si fiican u fahantaan xaaladahaaga caafimaad. Waxa laga yaabaa inaad wacdo maamulaha kiiska (kalkaalisaad iyo khabiirka cuntada ee diiwaangashan) kaasoo ku siin kara waxbarasho iyo taageero ku salaysan baahiyahaaga daryeel caafimaad. Agabka waxbarashada caafimaadka waxa kale oo laguu soo diri karaa iyadoo lagu salaynayo yoolalka aad dejisay adiga iyo maareeyaha kiiskaaga.

### **Sideen isku diiwaan geliyaa?**

Si aad ugu biirto barnaamijka, waa inaad buuxisaa shuruudaha qaar. Xubnaha buuxiya shuruudaha si toos ah ayaa loo diiwaangeliyaa. Molina Healthcare waxay isticmaashaa macluumaaadka soo socda si ay u aqoonsato xubnaha barnaamijyada maaraynta caafimaadka:

- Sheegashada
- Farmashiyaha
- Barnaamijyada kale ee maamulka caafimaadka
- Waxaad isu gudbin kartaa barnaamij, ama adeeg bixiyahaagu waa uu ku soo gudbin karaa. Adiga ayay ku jirtaa haddii aad rabto inaad ku jирто barnaamij. Waxaad codsan kartaa in lagaa saaro wakhti kasta.

Barnaamijyada, aad ku heli karto lacag la'aan, waxaa ka mid ah:



### **Molina Caafimaadkayga - Barnaamijka Joojinta Tubaakada**

Xubnaha qaangaarka ah, da'doodu tahay 18 ama ka weyn, kuwaas oo diyaar u ah inay isku dayaan oo joojiyaan isticmaalka tubaakada waxay si toos ah ula shaqayn doonaan Baraha Caafimaadka:

- Samee qorshe daryeel joojinta tubaakada ee la gaar yeelay
- Hel taageero dhammaan habka joojinta

Ilaha kale ee kaa caawinaya joojinta sigaarka: [Smokefree.gov](http://Smokefree.gov)



### **Molina Caafimaadkayga - Barnaamijka Maareynta Miisaanka**

Xubnaha dadka waa wayn ah, da'doodu tahay 18 iyo ka weyn, kuwaas oo xiisaynaya inay dhimaan miisaankooda (marka laga reebo kuwa loo qorsheeyay qallinka misaan dhimista). Maamule kiis ayaa:

- Kaala shaqayn doona si aad u samaysato qorshe lagu maamulo miisaanka
- Hubi in qorshaha daryeelka uu yahay mid gaar ah si loo buuxiyo baahiyahaaga
- Caawinta inaad gaarto yoolalkaaga dhimista miisaanka



## Molina Caafimaadkayga - Barnaamijka La-talinta Nafaqada

Molina waxay bixsaa Barnaamijka La tashiga Nafaqada si ay u taageerto baahiyahaaga caafimaadka nafaqeynta. Khabiirka cuntadda diiwaangashan ayaa si dhow kaagala shaqayn doona:

- Faham walaacyadaada caafimaad
- Kaala shaqayn doona si aad u samaysato qorshaha daryeelka la gaaryeelay.
- Ku siiya qalab iyo caawimo si aad si fiican isugu maareyso xaaladaada caafimaad. Molina My Health –La noolaanshaha Xiiqda ee ilmaha iyo xubnaha dadka waa wayn ah, da'da 2 iyo ka weyn, kuwaas oo laga helay cudurka xiiqda. Maamulaha kiiska ayaa kaa caawin doona:
- Fahamka iyo aqoonsiga astaamahaaga
- Ka fogow waxyaabaha kiciya ee kordhiya astaamaha
- Fahamka daawooyinka xiiqda ee laguu qoray



## Molina My Health – La noolaanshaha xanuunka macaanka

Xubnaha qaangaarka ah, da'doodu tahay 18 iyo ka weyn, kuwaas oo qaba cudurka sonkorta. Xubnuhu waxay la shaqayn doonaan maamulhooda kiisa oo waxay wax ka baran doonaan wax ku saabsan:

- Cunto caafimaad leh
- Muhiimadda ay leedahay baadhida sonkorta dhiiggaaga iyo ogaanshaha heerka hemoglobin A1c kaaga
- Qiimaha dhaqdhaqaqa maalinlaha ah
- Iyadoo la raacayo qorshaha is-maamulka sonkorowga ee uu dhakhtarkaagu muuijyay



## Molina My Health – La noolaanshaha Wadnaha Istaaga

Xubnaha qaangaarka ah, ee da'doodu tahay 18 iyo ka weyn, kuwaas oo laga helay cudurka wadnaha si wacan u shaqayn waaya. Xubnuhu waxay wax ka badan doonaan maareeyahooda kisa oo ku saabsan:

- Cunuda cuntada wadne caafimaad qaba
- La socodka miisaankaaga
- Uga warbixinta dhakhtarka isbeddela astaamaha
- Muhiimadda firfircoonda maalinlaha ah iyo qaadashada daawooyinka sida laguu qoray



## Molina My Health – La noolaanshaha COPD

Xubnaha qaangaarka ah, da'doodu tahay 18 iyo ka weyn, kuwaas oo qaba COPD. Xubnuhu waxay wax ka badan doonaan maareeyahooda kisa oo ku saabsan:

- Jimicsiga neefsashada
- Qorshaynta iyo hawlaha dardargelinta
- Tallaabooyinka badbaadada oksijiinta
- Muhiimadda qaadashada daawooyinka sida laguu qoray



## Molina My Health – La noolaanshaha Dhiig-karka

Xubnaha qaangaarka ah, ee da'doodu tahay 18 iyo ka weyn, kuwaas oo qaba cudur aqoonshada cadaadiska sare ee dhiiga. Xubnuhu waxay wax ka badan doonaan maareeyahooda kisa oo ku saabsan:

- Cunuda cuntada wadne caafimaad qaba
- La socodka cadaadiska dhiigga
- Muhiimadda dhaqdhaqaaqa maalinlaha ah
- Muhiimadda qaadashada daawooyinka sida lagu faray



## Molina My Health – La noolaanshaha Walbahaarka

Xubnaha qaangaarka ah, ee da'doodu tahay 18 ama ka weyn, kuwaas oo midkood laga helay walbahaarka ama laga yaabo inay qabaan calaamadaha walbahaarka. Barnaamijka waxaa loogu talagalay:

- Kor u qaadida aqoonsiga hore ee astaamaha
- Bixinta waxbarashada, hagitaan iyo taageerada
- Barida xirfadaha la qabsiga nolosha
- La wadaagida adeegyada lahelii karo, doorashoooyinka daawaynta iyo taageerada bulshada

## Dheefaha lagu daray Qiimaha (VAB)

Dheefaha lagu daray qiimaha (VAB) waxaa bixiya Molina Healthcare oo waxaa dheer dheefahaaga Apple Health. Kuwan waxay ku siin karaa doorashooyin badan ee daryeelka iyo asbaabaha cinwaanka bulshadda ee caafimaadka. VABs khasab maaha oo wax kharash ah adiga kuguma joogto.

### Barnaamijka Abaal marinta Xubinta\*

Molina waxay ku abaalmarisaa xubnaha dhamaystirka hawlaha fayoqabka ee la doortay sida tallaalada, daryeelka dhalmada ka hor iyo baadhista xanuunka macaanka.

Si aad u aragto liiska adeegyada abaal-marinta ee adiga iyo qoyskaaga, booqo **MolinaHealthcare.com/WA-Medicaid-wanaaggaa**.



Molina waxay fududaysaa si ka badan intii weligeed si aad u hesho abaal marinta caafimaadkaaga. Kaliya noo soo sheeg marka aad dhamaystirto hawlahaaga fayoobi waxaanu xaqijin doonaa faahfaahinta waxaan ku heli doonaa abaalmarintaada!

#### Sideen ku helaa abaal marintayda?

1. Ku buuxi adeegyada aad u qalanto adigu (ama carruurtaada) wakhtiga buure ah.
2. Booqo **boggayaga** wixii ah tilmaamaha sida loo helo abaal marintaada!

#### Xog Muhiim ah:

- Xubnaha Apple Health waxay heli karaan ilaa \$200 wadarta abaal marinaha jadwalka sanad walba.
- Abaalmarinta waxaa la heli karaa sanadkii hal mar ugu badnaan. Tusaale ahaan, baaritaanka Sonkorowga A1C waa in lagu dhammeeyaa 3-6 bilood oo kasta laakiin waxaad heli kartaa hal abaalmarin \$25 sannadka.
- Dhammaan codsiyada abaal-marintu waa in loo gudbiyaa Molina Healthcare ugu dambayn Janaayo 31, 2025, adeegyada aad dhammaystirtay 2024.

#### Su'aalaha?

Fadlan ka wac Adeegyada Xubinta: 1-800-869-7165 (TTY 711)

\* *Abaalmarinta caafimaadku way is beddeli kartaa ogeysiis la'aan. Xayiraado ayaa loo adeegsadaa*

## Muraayadaha indhaha oo bilaash ah

Si fiican u eeg. Si fiican u arag. Xubnaha Molina waxay hadda ka heli karaan muraayado bilaash ah Zenni Eyewear! Dheeftan waxaa loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 21+.

Ka baadh in ka badan 55 qaab onlayn ah, oo ay ku jiraan muraayadaha bifocal iyo horumarka. Isku day si dhab ah. Muraayadaha indhaha laguu sameeyo markaad dalbato oo ka dib loo doo diraa albaabkaaga!

U raac tallaabooyinkan fudud:

- Booqo [Molina.zennioptical.com](http://Molina.zennioptical.com) laga bilaabo kombuyuutar kamarada leh, taleefanka gacanta, ama tableedka
- Xaqiji xogtaada
- Isticmaal Aalada Zenni's Virtual Try-On
- Geli ama qaad sawirka dawo qoridaada
- Hel fareemada dookhaaga



## Xubinnimada Naadiga Wiilasha & Gabdhaha

Molina waxay dabooshaa xubinnimada sanadlaha ah kharashka\*\* ee xubnaha Apple Health, da'aha 6-18, xaga Naadiyada Boys & Girls gudaha Gobolka Washington. Ilmahaagu wuxuu geli karaa:

- Helitaanka naadiga saacadaha furan oo ay ku jiraan dugsiga kadib (furan goor dambe ilaa iyo 7:30 galabnimo)
- Helitaanka Naadiga Xagaaga
- Barnaamijyada dugsiga ka dib ee bilaashka ah ee xooga saaraya qaab nololeedka caafimaadka qaba, jidh dhisnaanta iyo taageerada shaqada guriga
- Badanka naadiyadu waxay bixiyaan cunto fudud oo bilaash ah
- Naadiyada qaarkood waxay bixin karaa gaadiid raac bilaash ah oo ka yimid dugsiga ilmahaaga ilaa Naadiga
- Iyo wax ka badan!

Booqo Nadigaaga Boys & Girls oo tus kaadhkaaga Aqoonsiga Xubinta Mpina si loogu biiro. Waxaad sidoo kale booqan kartaa [Washingtonclubs.org/locations](http://Washingtonclubs.org/locations) si aad u hesho naadi kuu dhow!

**\*\* Dheefta xubinnimada Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha waxay dabooshaa kharashka xubinnimada sannadlaha ah oo keliya. Naadiyada qaarkood waxay qiimeeyaan kharashka ka qaybgalka bishii, kuwaas oo ah mas'uuliyadda xubinta. Deeqda waxbarasho ee dheeraadka**

ah waxaa dhici karta in la helo, fadlan waydii Naadigaaga maxaliga ah ee Wiilashada & Gabdhaha.

### **Cuntooyinka Caafimaad ahaan loogu Talo-galay ee ka yimid FarmboxRx**

Molina waxay siisaa cuntada FarmboxRx iyo adeegyada taageerada sii deynta ka dib xubnaha xaqqa u leh intaad bogsanayso:

- Ilaa 28 cunto kariye oo la diyaariyey, cunto caafimaad leh ka dib bukaan jiifka joogitaanka isbitaalka
- Laba cunto maalintii hal toddobaad, ilaa laba toddobaad
- Cunto tayo leh
- Cunto diyaar u ah in la cuno 2-3 daqiiqo gudahood
- Looma baahna diyaargarow!

Macluumaad intaas ka badan, kala hadal tababarahaaga Kala-guurka ee Molina ka dib joogitaanka bukaan-jiifka.

### **Barnaamijka Kaalmada Telefoonka casriga ah<sup>▲</sup>**

Xubnaha u qalma waxay heli karaan qorshahan adeega gaarka ah ee Molina, kharash la'aan adiga, oo ay ku jiraan:

- Hadal aan xad lahayn
- Qoraal aan xadidnayn
- Wicitaan caalami ah<sup>▲▲</sup>

Molina waxay iskaashi la samaynaysaa TruConnect barnaamijkan kaalmada.



Maanta kooto samayso! Booqo

**TruConnect.com/Molina** ama wac 1-844-700-0795 (TTY 711).

<sup>▲</sup>Dheeftan waxaa loogu talagalay xubnaha u qalma dheefaha Khadka Nolosha ee FCC iyo Barnaamijka Isku xidhnaanta La awoodi karo (ACP).

<sup>▲▲</sup>U gaar ah xubnaha Molina: Dooro wadamada ay ku jiraan Meksiko, Kanada, Shiinaha, Koonfurta Kuuriya iyo Fiidnaam.

## Daryeelka degdega ah ee Onlaynka ah

Haddii aadan caafimaad qabin dareemayn aanad awoodin inaad soo booqato bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (PCP), Molina Healthcare waxay kuu keentaa daryeel - si badbaado leh oo badbaado leh - iyada oo adeegsanaysa Teladoc lacag la'aana.<sup>+</sup> Daryeelka degdega ah ee onlayka ah, waxaad kala hadli kartaa dhakhtarkaaga guddiga talefanka, casriga, tablet-ka ama kombiyutarka 24/7.



Daryeelka degdega ah ee dhabta ahi aad buu ugu fiican yahay:

- Jirooyinka yar sida hargabka, caabuqa sinka, dhuun xanuun, isha casaanka ah iyo xasaasiyad.

Isku diiwaan geli adeega maanta si aad dhammaantiin u diyaarsataan.

- Booqo [xubin.teladoc.com/molinawa](http://xubin.teladoc.com/molinawa)
- Wac 1-800-835-2362 (TTY 711)
- Soo deji Teladoc app: [teladoc.com/mobile](http://teladoc.com/mobile)

Adeegyada turjumaada ayaa diyaar ah. Xaaladaha degdega ah wac 911.

<sup>+</sup>*Molina waxay siisaa adeegan lacag la'aan xubnahayada Apple Health ee gobolka Washington iyada oo u sii marinaysa bixiyayaasha qandaraaska leh ee Teladoc. Qiimaha telefoonka gacanta iyo isticmaalka internatka ayaa la adeegsadaa.*

## Adeegyada Onlaynka ah ee Caafimaadka Dhaqanka

Molina Healthcare waxay iskaashi la samaynaysaa dhowr adeeg bixiyeyaasha telemedicine ah iyo goobo caafimaad oo bixin kara taageero marka aad la kulanto kelinimo, ama aad u baahan tahay daawaynta caafimaadka dhimirka iyo adeegyada daaweynta isticmaalka maandooriyaja Wuxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan taageerooyinkan ka heli kartaa Molina Healthcare boggeeda dheefaha qiimaha lagu daray ee hoosta cinwaanka *Behavioral Health & Recovery*, visit [MolinaHealthcare.com/MemberWA](http://MolinaHealthcare.com/MemberWA).

**La hadal adeeg bixiyaha caafimaadka dhaqanka adigoo jooga gurigaaga.**

Molina Healthcare waxay balaadhisay adeegyadeena onlaynka ah si ay ugu darto daryeelka caafimaadka dhimirka dhexda Teladoc. Hadda xubnuhu waxay ku heli karaan daawayn qarsoodi ah gudaha goobta aad doorato.

- Kaalmo u hel welwelka, khalkhalka cunto, walbahaarka, murugada, dhibaatooyinka qoyska iyo wax ka badan
- Ka dooro adeegbixiyaha dhakhaatiirta dhimirka, cilmi-nafsiga, ama daaweeeyayaasha ruqsada haysta
- Dooro daaweeeyaha ku salaysan takhasuska, goobta, luqadda, jinsiga iyo awoodda lagu qoro daawada

Ballan u qabso booqashadaada onlaynka ah. Ballamahu waxay diyaar yihiin todobada maalmood ee todobaaka, 7 subaxnimo ku 9 galabnimo waqtiga maxaliga ah. Xubnuhu waxay haysan karaan daaweeeyaha isku midka ah ballamaha socda, sidoo kale!

Qabso ballan daawaynta qarsoodiga ah maanta! Booqasho [Teladoc.com/MolinaWA](#) ama wac (800) 835-2362 (TTY 711).

Xaaladaha degdega ah wac 911.

### **BeMe App (ka caawi socodka shucuurta)**

BeMe waa abka fayo qabka caafimaadka dhimirka oo lagu dhisay da'yarta (da'da 13-19) si ay u caawiyaan maaraynta dareenka iyo caqabadaha (tusaale walbahaarka dugsiga, dhisidda kalsoonida, horumarinta caadooyinka caafimaadka leh, hagaajinta xidhiihada iyo wada xidhiihka, iyo la qabsiga u xoog sheegashada). Abku waxa uu ku siin karaa tababar toos ah iyo taageero dhibta haddii loo baahdo.

Ka raadi "BeMe" abka gudaha Apple App Store ama Google Play Store oo soo deji ama sawir lambarkan QR.



SCAN ME

### **Pyx Health App (caawinta kalnimada iyo welwelka)**

Qofna waa in aanu kaligiis marin caqabadaha nolosha.

Taasi waa sababta aanu xubnimada ugu bixino

abka Pyx Health. Dareen ladnaan maalin kasta iyaddoo lagu weheliyo iyo maad dhexda daateerada tejnoolajiga iyo shaqaale naxariis leh.

Maanta kooto samayso! Ka raadi "Pyx Health" gudaha Apple App Store ama Google Play Store. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [MolinaHealthcare.com/MemberWA](#).

## **Isku xidhka Daryeelka**

### **Adeegyada maaraynta kiisaska adag**

Maareynta kiisaska adag waa adeeg lagu caawiyo xubnaha leh baahiyo daryeel caafimaad oo adag ama badan si ay u helaan daryeel iyo adeegyo. Maamulayaasha kiisku waxay kaa caawinyaan isku xidhka daryeelkaaga, adiga oo maskaxda ku haya hadafyadaada. Wakiilka qorshaha ayaa laga yaabaa inuu soo jeediyo maareynta kiis ku saleysan su'aalaha looga jawaabay baadhitaanka caafimaadkaaga (Qiimaynta Caafimaadka) markaad is diiwaangeliso.

Waxaad codsan kartaa adeegyada maaraynta kiiska naftaada ama xubin qoyskaaga wakhti kasta. Adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka, qorsheeyayaasha ka saarida, daryelelayaasha iyo barnaamijyada maaraynta caafimaadka sidoo kale waxay kuu gudbin

karaan maarynta kiiska. Waa inaad ogolaataa adeegyada maarynta kiiska. Wixii su'aalo ah wac 1-800-869-7165 (TTY 711).

## Adeegyada Isku xidhka Daryeelka Dheeraadka ah ayaa laga yaabaa inaan bixino

### U wareegida xabsiga

Molina Healthcare of Washington waxay leedahay koox u go'an inay u gudbiso oo isku xidhka daryeelka dhammaan xubnaha ku xidhan jeelasha magaalada iyo degmada, xarumaha Waaxda Asluubta iyo xabsiyada iyo xarumaha dib u dejinta carruurta. Marka la ogeysiyo, shaqaalaha maamulka kiisku waxay isku dubaridi doonaan daryeelka xubnaha, shaqaalaha xabsiga, iyo shuraakada xulafada ah si ay isugu duweeyaan qorsheynta dib-u-soo-gelinta, ay bixiyaan taageerada agabka, oo ay u hubiyaan inay si habsami leh ugu soo noqdaan bulshada.

Isku xidhka daryeelka ku-meel-gaadhka ah waxa la bixin doonaa ilaa 30ka maalmood ee ugu horreeya ee xabsiga ama haddii loo baahdo marka xubinta la sii daayo waxaana ku jiri kara laakiin aan ku xaddidnayn:

- Ka caawinta xubnaha gaadiidka ballamaha
- Aasaaska daryeelka adeeg bixiyeyaasha caafimaadka iyo/ama caafimaadka dhaqanka
- Bixinta agabka guryaha
- Caawinta shaqada haddii loo baahdo
- Adeegyada kale ee taageerada sida la cadsado

Adeegyada isku xidhka daryeelka dheeraadka ah waxaa ka mid ah hubinta in aanay jirin dib u dhac ama gol daloollooyin xaga daryeelka iyadoo la dedejinayo oggolaanshaha adeega iyo daawooyinka hadba loo baahdo.

### Maareynta Kiiska

Adeegyada Maareynta Kiiska waxaa bixiya kalkaaliyayaal iyo shaqaale bulsho kuwaas oo ka caawiya xubnaha inay maareeyaan cudurrada raaga iyo caqabadaha hor istaaga is daryeelka. Maareeyayaasha kiiska ayaa ku caawin kara:

- Isku xidhka daryeelka adeeg bixiyeyaashaada
- Kuu gudbinaaya adeegyada loo baahan yahay
- Kugu xidhaaya ilaha bulshada
- Bixinta waxbarashada caafimaadka iyo tababarka
- Caawinta maareynta xaaladahaaga caafimaad

Molina Healthcare waxay rabtaa inay barato xubnaheenna oo ay siiso Adeegyada Maareynta Kiiska sida ugu dhakhsaha badan, kuwa u baahan. Xubnaha ku jira Maareynta Kiisku waa inay filayaan inay ka helaan wicitaan kooxdayada inta lagu jiro 6da horeO maalmood Diiwaangelinta si lagu weydiyo su'aalaha baadhitaanka (sidoo kale loo

yaqaan Qiimaynta Caafimaadka). Haddi aan awoodi waydo in aan kugula soo xidhiidho taleefoon, waxa aanu kuugu soo diri doonaa Qiimaynta Caafimaadka. Wuxaan buuxin kartaa oo dib ugu soo diri kartaa baqshadda ku jirta (boostada looma baahna), dib noogu soo wac, ama internetka ka gal **MyMolina.com** si loo dhamaystiro qiimaynta.

Maareynta Kiisku sidoo kale waxay taageertaa barnaamijyada takhasuska ee soo socda:

- Qaliinka caloosha si miisaanka loo dhimo
- Faaqidaada Lagu dabaqo dhaqanka (ABA) Daawaynta
- Adeegyada caafimaadka Qofka sinjiga beddelo
- Carruurta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah
- Unug ku beeriga jidhka
- Bixinta waxbarshadda, ilaha, iyo taageerada si loo caawiyo xubnaha inay si wanaagsan u fahmaan xaaladahooda.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada Maareynta Kiis, fadlan ka wac Adeegyada Xubinta at 1-800-869-7165 (TTY 711).

## Barnaamijka Caafimaadka Guriga

### Waa maxay Caafimaadka Gurigu?

Haddii aad u qalanto adeegyada Caafimaadka Guriga, waxaad heli doontaa wicitaanka soo dhawaynta iyo warqad faahfaahinaysa barnaamijka iyo adeegyada. Iskuduwaha Daryeelka ayaa diyaar u ah inuu kula kulmo oo uu ku siiyo adeegyada Guriga Caafimaadka shakhsii ahaan.

### Yaa u qalma adeegyada Caafimaadka Guriga?

Adeegyada Caafimaadka Guriga waa xubnaha Apple Health ee u baahan taageerada maaraynta xaaladahooda raaga oo waxay caawiyaan daryeelka isku duba ridka dhexda adeeg bixiyayaasha iyo adeegyada bulshadda. Masuulada Daryeelka Caafimaadka waxay go'aan ka gaadhaan cida u qalanta adeegyada Health Home.

Caafimaad Gurigu meel ma aha. Waa qaybo adeegyada isku xidhka daryeelka. Adeegyadan waxaa ka mid ah:

- Maamulka daryeelka dhammayska tiran
- Isku xidhka daryeelka iyo horumarinta caafimaadka
- Qorshaynta kala wareega ah ee dhammayska tiran - ka hel caawimo marka lagaa fasaxo cusbitaalka ama hay'ada kale sida guriga kalkaalisa
- Adeegyada taageerada shakhsiga ah iyo qoyska - waxay baraan qoyska, saaxiibada, iyo daryeelayaasha taageerida si loo gaadho hadafkaaga caafimaadka
- U gudbinta bulshadda iyo adeegyada taageerooyinka bulshadda
- Taageerada xaaladahaaga raaga iyo caawinta si aad u gaadho hadafyadaada caafimaadka

## Sidee ku biirista barnaamijka Guriga Caafimaadka u saameeya caymiskayga hadda?

Dheefahaaga Apple Health isma beddelaan, waxaana ku jira xuquuqaha rafcaanka

- Waxaad haysan kartaa adeeg bixiyayaasha aad haysato
- Isku duwaha daryeelka Caafimaadka Gurigaadeegayada waa dheefaha dheeraadka ah oo aan khasab ahayn lagugu heli karo kharash la'aan adiga

## Adeegyada Apple Health waa La ceymiyay iyadoon la helin qorshe daryeel ee la maareeyay

Apple Health waxay dabooshaa qayb adeegyada kale ah oo aan lagu daboolin hoosta qorshaha daryeelka la maareeyo (sidoo kale loo yaqaano sida kharashka adeega). Barnaamijyada kale ee bulshadda ku salaysan waxay daboolaan dheefaha soo socda iyo adeegyada ku qoran hoos xataa marka aad ka diiwaan gashan tahay anaga. Wuxaan isku xidhi doonaa PCP si lagaaga caawiyo helida adeegyadan iyo isku xidhka daryeelkaaga. Waxaad u baahan doontaa inaad u isticmaasho kaadhkaaga adeegyada ProviderOne dhammaan adeegyada.

Na soo wac su'aalaha ku saabsan dheefta ama adeega aan halkan ku qornayn. Arag daboolida Apple Helath oo aan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo buug yaraha wixii ah liiska dhammayska tiran ee adeegyada: [hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/19-065.pdf](http://hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/19-065.pdf).

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeegyada ilmo soo rididda	<p>Apple Health kharashka adeega la daboolo:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Ilmo soo rididda daawada, oo sidoo kale loo yaqaan kaniiniga ilmo soo rididda.</li> <li>• Qaliinka ilma soo ridka, sidoo kale loohi yeedho ilma soo ridka gudaha rugta.</li> </ul> <p>Macaamiisha ku jira ururka daryeelka la maareeyo ee Apple Health (MCO) waxa laga yaabaa inay iskood u gudbiyaan meel ka baxsan MCO-dooda adeegyada ilmo iska soo rididda. Waxaa ku jira daryeelka la socodka ah ee cudur ka sii dar ah oo kasta.</p>
Adeegyada Ambalaaska (Hawo)	Dhammaan adeegyada gaadiidka baabuurka gurmadka caafimaadka, la siiyay macaamiisha Apple Health, ay ku jiraan kuwan ka diiwaan gashan ururka daryeelka la maareeyo (MCO).
Adeegyada Ambalaaska (Ground)	Dhammaan adeegyada gaadiidka ambalaaska dhulka, xaaladaha degdegga ah iyo kuwa aan degdegga ahayn, waxaa la siiyaa macaamiisha Apple Health, oo ay ku jiraan kuwa ku qoran urur daryeel la maareeyey (MCO).

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeegyada dhibta	<p>Adeegyada dhibaatooyinka ayaa la heli karaa si ay kuu caawiyaan, iyadoo lagu saleynayo halka aad ku noosshahay. Soo wac 911 gurmadka nolosha khatar gelayso ama 988 wixii ah gurmadka caafimaadka maskaxda. Eeg <b>Bogga 23</b> ee lambarada aaggaaga.</p> <p>Khadka Nolosha ee Ka-hortagga Is-dilka Qaranka: Wac ama u dir 988 ama wac 1-800-273-8255, Iisticmaalayaasha TTY 1-206-461-3219. Caafimaadka dhimirka ama dhibaatooyinka khalkhalka isticmaalka mukhaadaraadka, fadlan wac hay'adaha Adeegyada Maamulka Hbdhaqanka Caafimaadka (BH-ASO). BH-ASO waxay taageeraan adeegyada dhinta ee dadka degen Washington iyaddoon loo eegin u qalmida Apple Health. Lambarada telefoonka waxaa laga heli karaa <b>Bogga 23</b> kor, ama xaga: <a href="http://hca.wa.gov/mental-health-crisis-lines">hca.wa.gov/mental-health-crisis-lines</a>.</p>
Adeegyada ilkaha	<p>Adeegyada la qandaraaso waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Dawo qorida uu qoro dhakhtarka ilkahu.</li> <li>• Adeegyada ABCD ay bixiyaan adeeg bixiyaha la ansixiyay ee ABCD.</li> <li>• Adeega caafimaadka/qaliinka uu bixiyo dhakhtarka ilkahu.</li> <li>• Qaliinka Cusbitaalka/Goobta Wareejinta Goobta Xarunta kharashka ku dalacda.</li> </ul> <p>Dhammaan adeegyada ilkaha waxaa daboola Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo. Waa inaad aragtaa adeeg bixiyaha ilkaha kaas aqbalay inuu biilka u diro Apple Health iyaddoon lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo adoo isticmaalaya kaadhka adeegyadaada ProviderOne.</p> <p>Wax badan ka ogow:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Onlayn bogga <a href="http://hca.wa.gov/dental-services">hca.wa.gov/dental-services</a>, ama</li> <li>• Ka wac HCA lambarka 1-800-562-3022.</li> </ul> <p>Si aad u hesho adeeg bixiye aqbala Washington Apple Health onlaysinka ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• <a href="http://DentistLink.org">DentistLink.org</a> ama</li> <li>• <a href="http://Fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/">Fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/</a></li> </ul>

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Muraayadaha indhaha iyo Adeegyada ku habboon	<p>Carruurta 20 sano jirka iyo dhaliyarada – fareemada muraayadaha indhaha, baliisha, Baliisha indha lagu dhagsado, iyo adeegyada ku habboon waxaa daboolaya caymiska Apple Health iyada oo aan la helin qorshe daryeel ee la maareeyey.</p> <p>Dadka waaweyn 21 sanadood iyo wixii ka weyn – faree, ada muraayadaha indhaha iyo baliisha indhaha ma daboolaan Apple Health, laakiin haddii aad rabto inaad iibsato, waad ku dalban kartaa iyaga oo u maraya bixiyeyaasha indhaha ee kaqeyb gala qiimaha la dhimay. Booqo: <a href="https://hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf">hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/optical_providers_adult_medicaid.pdf</a>.</p>
Adeegyada Taakulaynta Hooyada ee First Steps (MSS) iyo Maareynta Kiiska Dhallaanka (ICM), iyo Waxbarashadda Dhalashada ilmaha (CBE)	<p>MSS waxay siisaa shakhsiyadka uurka leh iyo ka hor dhalmada ka hortagga caafimaadka iyo adeegyada waxbarashadda gudaha guriga ama xafiiska si looga caawiyo uur caafimaad leh iyo ilmo caafimaad qaba/ ICM waxay ka caawisaa qoysaska leh carruurta ilaa hal sano ah inay wax ka ogaadaan, iyo sida loo isticmaalo, baahiyaha caafimaad, ee bulsho, waxbarasho, iyo ilaha kale ee bulshada si ilmaha iyo qoysku u kobcaan.</p> <p>CBE waxay siisaa shakhsiyadka uurka leh kooxdooda shakhsiyadada taageerada fasalo marka ay barayaan adeeg bixiyaha HCA CBE. Mowduucyada waxaa ka mid ah calaamadaha uurka, nafaqada, naas nuujinta, qorshaha ilma dhalida, waxa laga filayo muddada foosha iyo ummulida, iyo badbaadada ilmaha dhashada.</p> <p>Adeeg bixiyeyaasha aagaaga, booqo <a href="https://hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/i-need-medical-dental-or-vision-care/first-steps-enhanced-services">hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/i-need-medical-dental-or-vision-care/first-steps-enhanced-services</a>.</p>
Daryeelka Bukaan jiifka Dhimirka ee Carruurta (Barnaamijka Bukaan jiifka Xiliga dheer ee Carruurta (CLIP) ee da'aha 5 ilaa 17 sano jirka)	Waa inay bixisaa Waaxda Caafimaadka (DOH) wakaalada la aqoonsan yahay. Nala soo wac si aan kaaga caawino helitaanka adeegyadan.

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Adeegyada Daryeelka Muddada-dheer iyo Caawimaadda (LTSS)	Eeg <b>Bogga 54</b> ee buug-yarahan.
Ka xidhida dhalmada, da'da 20 iyo wixii ka yar	Waa inuu buuxiyo foomka madhalays ka dhigidda 30 maalmood ka hor ama buuxiyo shuruudaha ka dhaafidda. Dib u soo celinta aan la daboolin.
Adeegyada Transhealth	Adeegyada waxaa ku jira nidaamyada qaliinka, waxteelda timaada qaliinka ka dib, iyo baabiinta jirada timaha ama ku jirada laysar timaha si loogu diyaariyo qaliinka xubinta taranka. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay. Ogolaansho hore wac 1-800-562-3022 ama iimayl <a href="mailto:transhealth@hca.wa.gov">transhealth@hca.wa.gov</a> . Wax badan ka baro <a href="http://hca.wa.gov/transhealth">hca.wa.gov/transhealth</a> .
Maadada Isticmaalka Dadka Uurka leh (SUPP) Barnaamijka	Barnaamijka SUPP waa barnaamij isbitaal ku salaysan bukaan-jiif oo loogu talagalay shakhsiyaadka uurka leh ee qaba baahi caafimaad iyo taariikhda isticmaalka maandooriyaha. Ujeedada barnaamiju waa in la yareeyo waxyeelada waalidka dhalaya iyo carruurtooda aan welii dhalan iyaddoo lagu siinayo maaraynta dib u gurista iyo degenaanshaha caafimaadka iyo daawaynta gudaha goobta cusbitaalka.  Wixii macluumaad dheeraad ah iyo liiska adeeg bixiyeyaasha la ansixiyay, booqo <a href="http://hca.wa.gov/sup-program">hca.wa.gov/sup-program</a> .
Gaadiidka loogu talagalay ballamaha caafimaadka aan degdegga ahayn	Apple Health waxay bixisaa adeegyada gaadiidka ee lagu tago ama lagaga yimaadk ballamaha daryeelka caafimaadka. Soo wac gaadiidka adeeg bixiyaha (dilaa) aagaaga si aad u barato wax ku saabsan adeegyada iyo xadidaaha. Dilaalkaaga gobolka ayaa kuu habbayn doona gaadiidka ugu habboon, ugu jabab. Liiska dilaaliinta waxaa laga heli karaa bogga <a href="http://hca.wa.gov/transportation-help">hca.wa.gov/transportation-help</a> .

## Adeegyada iyo taageerada muddada-dheer (LTSS)

Maamulka Gabowga iyo Caawimaadda Muddada Dheer (ALTSA) - Adeegyada Guriga iyo Bulshada (HCS) waxay siisaa dadka waaweyn adeegyo daryeel muddo-dheer iyo shakhsiyaadka naafada ah ee guryahooda ku nool, oo ay ku jiraan daryeel-bixiye guri-dhexdiisa ah, ama goobaha la deggan yahay ee bulshada. HCS sidoo kale waxay bixiyaan adeegyada si loo caawiyo dadka ka wareegaya guryaha kalkaaliska iyo caawinaya daryeel

bixiyayaasha qoyska. Adeegyadan ma bixiyon qorshahaaga caafimaadku. Si aad u hesho maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada daryeelka muddada-dheer, wac xafiiskaaga HCS ee deegaankaaga.

**LTSS** ALTSA Guriga iyo Adeegyada Beesha waa inay ansixiyaan adeegyadan. Wac xafiiska HCS ee deegaankaaga wixii maclummaad dheeraad ah:

**GOBOLKA 1** – Adams, Asotin, Benton, Chelan, Columbia, Douglas, Ferry, Franklin, Garfield, Grant, Kittitas, Klickitat, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens, Walla Walla, Whitman, Yakima – 1-509-568-3767 ama 1-866-323-9409

**GOBOLKA 2N** – Island, San Juan, Skagit, Snohomish, iyo Whatcom – 1-800-780-7094 Nursing Facility Intake

**GOBOLKA 2S** – King – 1-206-341-7750

**GOBOLKA 3** – Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Kitsap, Lewis, Mason, Pacific, Pierce, Thurston, Skamania, Wahkiakum – 1-800-786-3799

Maamulka Naafada Korriimada (DDA) waxay ujeedadeedu tahay inay ka caawiso carruurta iyo dadka waaweyn ee naafonimada korriinka leh iyo qoysaskooda inay helaan adeegyo iyo caadimaado ku saleysan baahida iyo xulashada bulshada ay rabaan. Si aad u hesho maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada iyo taageerada, booqo [dshs.wa.gov/dda](http://dshs.wa.gov/dda) ama wac xafiiska DDA deegaankaaga ee hoos ku qoran.

#### **Adeegyada dadka qaba naafanimada koriinka**

Maamulka Naafada Korriinka (DDA) waa inay ansixiyaan adeegyadan. Haddii aad u baahan tahay maclummaad ama adeegyo fadlan la xiriir xafiiskaaga maxalliga ah ee DDA:

**GOBOLKA 1** – Asotin, Chelan, Douglas, Ferry, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens, Whitman  
1-800-319-7116 ama iimayl [R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov](mailto:R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov)

**GOBOLKA 1** – Adams, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Grant, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Yakima  
1-866-715-3646 ama iimayl [R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov](mailto:R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov)

**GOBOLKA 2N** – Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom – 1-800-567-5582 ama iimayl [R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov](mailto:R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov)

**GOBOLKA 2S** – King  
1-800-974-4428 ama iimayl [R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov](mailto:R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov)

**GOBOLKA 3** – Kitsap, Pierce  
1-800-735-6740 ama iimayl [R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov](mailto:R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov)

**GOBOLKA 3** – Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum  
1-888-707-1202 ama iimayl [R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov](mailto:R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov)

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) waxay siisaa adeegyo iyo barnaamijyo carruurta da'doodu ka yar tahay 5 sano.

**Barnaamijka Carrurnimada Hore iyo Barnaamijka Caawinta (ECEAP) iyo Head Start** waa barnaamijyada dugsiga barbaarinta ka hor ee Washington oo u diyaariya 3 ilaa iyo 4 sano jir ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo si u guulaystan iskuulka iyo nolosha. ECEAP waxay u furantahay ilmo kasta iyo qoys kasta oo dugsiga xannaanadda ka hor ah haddii ay buuxiyaan xadka dakhliga. Wixii macluumaad ah ee ECEAP iyo HeadStart ee booqashooyinka dugsiga barbaarinta ka hor [dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/eceap-headstart](http://dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/eceap-headstart).

**Adeegyada Taakulaynta Hore ee Dhallaanka iyo Caruurta yaryar (ESIT)** waxaa loogu talagalay inay awood u siiso carruurta dhalashada ilaa saddex ee leh dib-u-dhaca korriinka ama naafanimada inay noqdaan kuwo firfircoon oo guuleysta inta lagu jiro sannadaha hore ee carruurnimada iyo mustaqbal ka meelo kala duwan, Goobaha waxaa ka mid ah guryahooda, daryeelka ilmaha, dugsiga barbaarinta ama barnaamijyada dugsiga, gudaha bulshaddooda. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo [dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/esit](http://dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/esit).

**Booqashada Guriga ee Qoysasku** (Home Visiting for Families) waa ikhtiyaari, oo diiradda saaraya qoyska waxaana loo fidiyaa waalidiinta mustaqbal ka iyo qoysaska leh dhalaanka cusub iyo carruurta yar si ay u taageeraan caafimaadka jir ahaaneed, bulsho, iyo dareenka caafimaad ee ilmahaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo [dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/home-visiting](http://dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/home-visiting).

**Adeegyada Fargelinata Caruurnimada Hore iyo Adeegyada Kahortaga (ECLIPSE)** waxay u adeegtaa caruurta dhalata ilaa 5 sano jir ee halista ugu jira xadgudubka caruurta iyo dayacaad waxaana laga yaabaa inay la kulmaan arrimo caafimaad dabeeecadeed sababo la xiriira in loo gaysto dhaawac culus. Adeegyada waxaa lagu bixiyaa Degmadda King iyo Degmadda Yakima. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo [dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/eceap](http://dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/eceap).

Nalasoo xidhiidh oo waxaanu kaa caawin inaanu kugu xidhno adeegyadan.

## Adeegyada ka baxsan (aan la daboolin)

Adeegyada soo socda kuma jiraan Apple Health, ama Apple Health iyada oo aan lahayn qorshe daryeel la maareeyey. Haddii aad hesho wax adeegyadan ah, waxaad bixin doontaa biilka. Ka wac Molina Healthcare wixii su'aalo ah ama si aad u aragto haddii ay jirto ikhtiyaarka Dheefta Qiimaha lagu daray ee adeega aan la daboolin. Eeg hagahayaga Faa'iidooyinka Qiimaha lagu daray wixii macluumaad dheeraad ah halkan [hca.wa.gov/vab-chart](http://hca.wa.gov/vab-chart).

Adeega	Macluumaad dheeraad ah
Daawooyinka kale	Akubanjarka, dhaqamada diinta ku salaysan, ku dawaynta caqiiqada, daawaynta dhirta, ku dawaynta dawayn yar oo dabiici ah, duugida jidhka, ama daawaynta duugida.
Daryeelka dawaynta Jidhka ee dadka waa wayn (21 iyo ka wayn)	
Qurxinta la doorto ama qaliinka is qurxinta	Ay ku jirto qaadista haraga wejiga, ka baabiinta taatuuga, ama ku beerida timaha.
Cudur aqoonsashada iyo Daaweynta Madhalaysnimada, dareen la'aanta galmada, iyo galmada oo aan si wanaagsan u shaqayn	
La talinta guurka iyo daaweynta galmada	
Qalabka aan caafimaadka ahayn	Sida qalabka birta loo dhigo curyaanku inuu ku galo guriga ama habayn kale oo guriga ah.
Waxyaabaha raaxada qof ahaandeed	
Baaritaanka Jdhka ah ee looga baahan yahay shaqada, caymiska, ama ruqsad siinta	
Adeegyada aanu oggolaan ogolaadeen sharciga federaalka ama gobolka iyo dhulalkeeda iyo lahaanshaha	Dhulka Mareykanka waxaa ka mid ah: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Puerto Rico</li> <li>• Guam</li> <li>• US Virgin Islands</li> <li>• Northern Mariana Islands</li> <li>• American Samoa</li> </ul>
Adeegyada lagu bixiyo Dibadda Mareykanka	
Dhimista miisaanka iyo adeegyada xakamaynta	Daawooyinka miisaanka dhimaya, alaabta, xubinimada jiimka, ama qalabka ujeedada yaraynta miisaanka.

## Helida macluumaaadkaaga caafimaadka



### Abka Moobilka My Molina

Molina Healthcare waxay leedahay abka moobilka oo waxaad ku soo dejisan kartaa (Ingiriisi ama Isbaanish). Abkan waxa uu ku siyyaa helida macluumaaadka xubinta caawimada leh ee telefoonkaaga casriga ah ama taableedka. Waxay kuu ogolaanaysaa:

- Raadi adeeg bixiye ama rugtaada kuu dhow
- Kaadhkaaga aqoonsiga Molina ka arag taleefankaaga
- Beddel adeeg bixiyahaaga
- Raadi ilaha bulshada si aad u hesho caawimo dheeraad ah qoyskaaga
- Iyo in ka badan!

Si aad u soo dejiso abka aad Apple App Store ama Google Play Store; ama iskaan saar koodka QR ee hoose.



SCAN ME

Haddii aad u baahan tahay caawimo, fadlan kala xidhiidh Molina Healthcare lambarka 1-800-869-7165 (TTY 711).



### MyMolina.com

Haddii aad door bidayso inaad isticmaasho kombayutarka miiska, booqo MyMolina.com, Bogga xubintayada aaminka ah, si aad si fudud u hesho kaadhka aqoonsiga cusub, codso maamulaha kiis, arag macluumaaadka caafimaadka iyo wax ka badan.

## Haddii aadan ku faraxsanayn adeeg bixiyahaaga, qorshaha caafimaadka, ama dhinac kasta oo daryeelka ah

Adiga ama wakiilkaaga haysta ogolaanshaha waxaad xaq u leediihin inaad dacwad xaraysaan. Tan waxaa lagu magacaabaa cabasho. Wuxaan kaa caawin doonaa inaad xarayso cabasho. Si aad cabasho u gudbiso, naga soo wac 1-800-869-7165 (TTY 711) ama noogu soo qor halkan:

Limayl: [WAMemberServices@MolinaHealthcare.com](mailto:WAMemberServices@MolinaHealthcare.com)

Fakis: 1-877-814-0342

Boostada: Molina Healthcare

Digtooni: Codsiyada Xubinta  
 P.O. Box 4004  
 Bothell, WA 98041-4004

### **Cabashooyinka ama tabashooyinku waxay noqon karaan:**

- Dhibaatada xafiiska dhakhtarkaaga.
- Ka qaadashada biil dhakhtarkaaga.
- U dirida soo ururinta sababtoo ah biil caafimaad oo aan la bixin.
- Tayada daryeelkaaga ama sida laguula dhaqmay.
- Adeegga ay bixiyaan dhakhaatiirta ama qorshaha caafimaadka.
- Dhibaatooyin kasta oo kale oo kaa haysata helitaanka daryeel caafimaad.

Waa inaan kugu ogeysiino taleefoon ama warqad inaan ku helnay cabashadaada ama cabashadaada laba maalmood oo shaqo gudahood. Waa in aan wax ka qabano walacyadaada sida ugu dhaqsaха badan laakiin ma qaadan karno wax ka badan 45 maalmood. Waxaad heli kartaa nuqlu bilaash ah oo ah xeerarkayaga cabashada adiga oo na soo wacaya.

### **U doodayaasha Caafimaadka Dhaqanka (oo hore loogu yeeri jiray Ombuds)**

U doodaha Caafimaadka Dhaqanka waa qof diyaar u ah inuu bixiyo gargaar bilaash ah oo qarsoodi ah xaga xallinta walaacyada la xidhiidha adeegyada caafimaadka dhaqanka. Waxay kaa caawin karaan xalinta walaacyadaada haddii aad qabto cabashada dhaqanka caafimaadka, rafcaan, ama dhegaysiga xaqa ah. U doodaha Caafimaadka Dhaqanka wuu ka madax banaan yahay qorshahaaga caafimaadka. Waxaa bixiya qof lahaa adeegyada caafimaadka dhaqanka, ama qof xubnaha qoyskiisu ay lahaayeen adeegyada caafimaadka dhaqanka.

Isticmaal lambarada telefoonka hoose si aad ula xidhiidho u doodaha caafimaadka dhaqanka ee aagaaga.

Kala xidhiidh dhammaan gobollada lambarka 1-800-366-3103. Ama iimayl u dir Xafiiska U doodista Caafimaadka Dhaqanka ee ku taal [info@obadvocacy.org](mailto:info@obadvocacy.org).

Molina Healthcare waxay balaadhisay adeegyadeena onlaynka ah si ay ugu darto daryeelka caafimaadka dhimirka dhexda Teladoc. Hadda xubnuhu waxay ku heli karaan daawayn qarsoodi ah gudaha goobta aad doorato.

- Kaalmo u hel welwelka, khalkhalka cunto, walbahaarka, murugada, dhibaatooyinka qoyska iyo wax ka badan
- Ka dooro adeegbixiyaha dhakhaatiirta dhimirka, cilmi-nafsiga, ama daaweyayaasha ruqsada haysta
- Dooro daaweyaha ku salaysan takhasuska, goobta, luqadda, jinsiga iyo awoodda lagu qoro daawada

Ballan u qabso booqashadaada onlaynka ah. Ballamaha waxa la heli karaa todobada maalmood ee todobaaka, 7 subaxnimo ku 9 galabnimo waqtiga maxaliga ah. Xubnuhu waxay haysan karaan daaweyaha isku midka ah ballamaha socda, sidoo kale!

Qabso ballan daawaynta qarsoodiga ah maanta! Booqo [Teladoc.com/MolinaWA](#) ama wac (844)-870-6821.

Gobolka	Degmooyinka	Laymanka dhita
Great Rivers	Cowlitz, Grays Harbor, Lewis, Pacific, Wahkiakum	1-800-803-8833
Greater Columbia	Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Kittitas, Walla Walla, Whitman, Yakima	1-888-544-9986
King	King	1-866-427-4747
North Central	Chelan, Douglas, Grant, Okanogan	1-800-852-2923
North Sound	Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom	1-800-584-3578
Pierce	Pierce	1-800-576-7764
Salish	Clallam, Jefferson, Kitsap	1-888-910-0416
Spokane	Adams, Ferry, Lincoln, Pend Oreille, Spokane, Stevens	1-877-266-1818
Koonfur Galbeed	Clark, Klickitat, Skamania	1-800-626-8137
Thurston-Mason	Mason, Thurston	1-800-270-0041

## Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan diidmooyinka, rafcaannada, iyo dhageysiga maaraynta.

**Diidmo** waa marka qorshahaaga caafimaad aanu ogolaan ama bixinayn adeeg adiga ama dhakhtarkaagu midkiin Aad codsateen. Marka aan diidno adeeg, waxaan kuu soo diri doonaa warqad kuu sheegaysa sababta aan u diidnay adeega la codsado. Warqaddan waa ogaysiska go'aankayaha. Waxay ku ogaysiin doontaa xuquuqdaada iyo macluumaadka ku saabsan sida loo codsado rafcaanka.

Waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato dib-u-eegista go'aan kasta haddii Aad u malaynayso in aanu sax ahayn, dhammaan macluumaadka caafimaadka inaan latxigelin, ama waxaad u maleynaysaa in go'aanka ay tahay inuu qof kale dib u eego.

**Rafcaanku** waa markaad na weydiiso inaan dib u eegno kiiskaaga mar labaad maxaa yeelay waad diidan tahay go'aankayaga. Wuxaad racfaan ka qaadan kartaa adeeg la diiday. Wuxaad soo waci kartaa ama qori kartaa si aan noo gaysiiso, laakiin waa inaad nagu wargeliso rafcaankaaga gudaha 60 maalmood jadwalka taariikhda diidmada. Wuxaan kaa caawin karnaa inaad buuxiso rafcaan. Adeeg bixiyahaaga, U doodaha Caafimaadka Dhaqanka, ama qof kale ayaa laga yaabaa inuu rafcaan kaa qaato haddii aad saxeexdo si aad u sheegto inaad ogolaatay racfaanka. Kaliya waxaad haysataa 10 maalmood si aad rafcaan uga qaadato haddii aad rabto inaad sii wadato helitaanka adeega aad hesho inta aanu dib u eegeyno go'aankayaga. Wuxaan kuugu soo jawaabi doonaa qoraal anagoo kuu sheegeyna inaan helnay dalabkaaga racfaanka muddo 5 maalmood gudahood. Inta badan kiisaska waxaanu dib u eegi doonaa oo go'aansan doonaa racfaankaaga 14 maalmood gudahood. Waa inaanu kuu sheegno haddii aanu u baahanahay wakhti dheeraad ah si go'aan loo gaadho. Go'aanka racfaanka waa in lagu gaadhaa 28 maalmood gudahood.

Wuxaad ku codsan kartaa racfaan af ama qoraal. U dir codsi racfaan oo qoraal ah Member Appeals, Molina Healthcare, P.O. Box 4004, Bothell, WA 98041-4004, via Fax 1-877-814-0342 ama iimayl [WAMemberServices@MolinaHealthcare.com](mailto:WAMemberServices@MolinaHealthcare.com). Wuxaan kaa caawin karnaa xeraynta racfaankaaga. Si aad u codsato rafcaan hadal ahaan, naga soo wac at 1-800-869-7165 (TTY 711).

**FIIRO GAAR AH:** Haddii aad sii wadato adeega muddada nidaamka racfaanka oo aad lumiso racfaanka, **waxaa laga yaabaa inaad bixiso adeegyada aad heshay.**

**Haddii ay degdeg tahay.** Xaaladaha caafimaadka degdega ah, adiga ama dhakhtarkaagu wuxaad waydiisan kartaan rafcaanka la dedejiyay (degdeg ah) adiga oo soo wacaya. Haddii xaaladaada caafimaadku u baahan tahay, go'aanka waxaa la gaadhi doonaa ku saabsan daryeelkaaga saddex maalmood gudahood. Si loo waydiyo rafcaanka la dedejiyay, noo sheeg sababta aad ugu baahan tahay go'aanka degdega ah. Haddii aanu diidno codsigaaga, rafcaankaaga waxaa dib loo eegi doonaa wakhtiyo la midka wakhtigas sare. Waa inaan samayno dedaalo macquul ah si laguu siiyo ogaysiiska dhiirinta hadalka ah haddii aanu diidno codsigaaga rafcaanka la dedejiyay. Wuxaad soo xarayn doontaa cabashada haddii aanad jeclayn go'aanka si loo beddelo codsigaaga rafcaanka la dedejiyay ilaa rafcaan caadi ah. Wuxaanu isku deyi doonaa inaan ku soo wacno haddii aanu diidno codsigaaga rafcaanka la kordhiyay markaas waxaanu sharaxi karnaa sababta oo waxaanu wayn doonaa ka jawaabida su'aalo kasta. Waa inaan boosta kuugu soo dirnaa ogaysiis qoraal ah laba maalmood gudahood ka dib markii go'aanka la gaadho.

Haddii aad khilafto go'aanka dacwada, wuxaad xaq u leedahay inaad rafcaan kaga qaadato go'aanka dhexda nidaamka dhegaysiga maamuleed. Dhageysiga maamulka, Garsooraha Maamulka Sharciga oo aan anaga noo shaqayn ama HCA u shaqeyn ayaa dib u eegi doona kiiskaaga.

Wuxaad haysataa 120 maalmood laga bilaabo taariikhda go'aanka rafcaanka aanu ku codsanayno dhegaysi maamul. Kaliya waxaad haysataa 10 maalmood si aad u codsato

dhageysi maamul haddii aad rabto inaad sii wadato helitaanka adeegii aad heli jirtay ka hor diidmadayada.

Si aad u codsato dhageysi maamul waxaad u baahan doontaa inaad u sheegto Xafiiska Dhageysiga Maamulka in Molina Healthcare ay ku lug leedahay; sababta dhegeysiga; adeegee loo diiday; taariikhda la diiday; iyo taariikhda racfaanka la diiday. Sidoo kale, hubso inaad bixiso magacaaga, cinwaanka, iyo lambarka telefoonka.

U soo gudbi codsiga dhageysiga adigoo:

1. Wacitaanka Xafiiska Dhagaysiyada Maamulka ([oah.wa.gov](http://oah.wa.gov)) ku 1-800-583-8271,  
Ama
2. U qoraya warqad:  
Office of Administrative Hearings  
P.O. Box 42489  
Olympia, WA 98504-2489

Waxaad la heli kartaa qareenka ama qof kale ayaa ku metelaya adiga xaga dhegaysiga. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka qareen, booqo [nwjustice.org](http://nwjustice.org) ama wac khadka cad ee NW Justice CLEAR lambarka 1-888-201-1014. Garsooraha dhegaysiga maamuleed waxa uu kuu soo diri doonaa ogaysiis sharaxaga go'aankooda. Haddii aad diido go'aanka dhagaysiga, waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadato si toos ah Guddida Rafcaanada HCA ama addoo waydiinaya dib u eegida dacwadaada ee Ururka Dib u eegida Madaxa banaan (IRO);

**Waqtiga xaddidan ee muhiimka ah:** Go'aankan ka yimid dhegaysiga waxa uu noqdaa marka u dambeeyaya **21 maalmood** gudahooda laga bilaabo taariikhda boosta lagu soo diray haddii aanad qaadin tallaabo si aad rafcaan uga qaadato go'aanka dhegaysiga.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka dhegeysiga, waxaad codsan kartaa Dib-u-eegis Madax-bannaan. Uma baahnid inaad hesho dib u eegis madax banaan oo waxaad ka boodi kartaa tallaabadan oo waydiiso dib u eegida ka timid Guddida Rafcaanada HCA.

**IRO** waa dib u eegista madax banaan oo uu sameeyay dhakhtar aan anaga noo shaqayn. Si loo codsado IRO, waa inaad nasoo wacdaa dib u eegida IRO 21 maalmood gudahood ka dib markaad hesho go'aanka warqadda go'aanka dhegaysiga. Waa inaad na siisaa macluumaa kasta oo dheeraad ah shan maalmood gudahood markaad waydiisato IRO. Waanu ku ogaysiin doonaa go'aanka IRO.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta IRO, fadlan la xidhiidh Molina Healthcare:

limayl: [WAMemberServices@MolinaHealthcare.com](mailto:WAMemberServices@MolinaHealthcare.com)

Fakis: 1-877-814-0342

Boostada: Molina Healthcare

Attention: Member Appeals

P.O. Box 4004

Bothell, WA 98041-4004

Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka IRO, waxaad weydiisan kartaa inaad hesho garsoore dib-u-eegis ku sameeya Guddiga Rafcaannada ee HCA si uu dib ugu eego dacwaddaada. Waxaad haysataa 2 kaliya1 maalmood si aad u codsato dib u eegista ka dib markii aad hesho warqadda go'aanka IRO. Go'aanka garsooraha dib u eegista waa kama dambays. Si aad u weydiiso garsooraha dib u eegista inuu dib u eego kiiskaaga:

- Wac 1-844-728-5212,  
Ama
- U qor:  
HCA Board of Appeals  
P.O. Box 42700  
Olympia, WA 98504-2700

## Xuquuqdaada

Sidii qof diiwaan gashan, waxaad xaq u leedahay inaad:

- Gaadho go'aano ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka, ay ku jiraan diidista daawaynta. Tan waxaa ka mid ah adeegyada caafimaadka jidhka iyo dhaqanka.
- Ka war hel dhammaan doorashooinka daawaynta ee jira, iyadoon loo eegin qiimaha.
- Dooro ama beddel PCP gaaga.
- Ka hel rayiga labaad ee ka yimid adeeg bixiye kale oo ku jira qorshahaaga caafimaad.
- Hel adeegyada waqtii ku habboon.
- Halaguula dhaqmo si xushmad iyo karaamo leh. Takoorka lama ogola. Qofna si ka duwan loolama dhaqmo ama aan xaq ahayn sababtoo ah isirkooda, midabka, asalka qaranka, sinjiga, dookha galmaada, da'da, diinta, caqiidada, ama naafanimada.
- Si xor ah uga hadal daryeelkaaga caafimaad iyo walaacyo oo aan lahayn natijjooyin kasta oo xun.
- Hayso macluumaadkaga iyo xil qarinta ilaashan ee ku saabsan in daryeelkaaga qarsoodi loo hayo.
- Waydiiso oo hel koobiyada diiwaanadaada caafimaadka.

- Dalbo oo halaguu saxo diiwaanadaada caafimaadka marka loo baahdo.
- Weydii oo hel maclumaadka ku saabsan:
  - Daryeelkaaga caafimaadka iyo adeegyada la daboolay.
  - Adeeg bixiyahaaga iyo sida loogu gudbiyo dhakhtarada takhasuska iyo adeeg bixiyayaasha kale.
  - Sida aanu lacagta u siino adeeg bixiyayaashaada daryeelkaaga caafimaad.
  - Dhammaan doorashooyinka daryeelka iyo sababta aad u helayso noocyada daryeelka qaarkood.
  - Sida loo helo caawimada soo xaraynta cabasho ama cabashada ku saabsan daryeelkaaga ama caawimada waydiisashada dib u eegida adeegyada la diiday ama rafcaanka.
  - Qaab dhismeedka ururkeena oo ay ku jiraan xeerarka iyo nidaamyada, habraacyada hab-dhaqanka, iyo sida loogu taliyo isbeddelada.
- Hel xeerarka qorshaha, dheefaha, adeegyada iyo Xuquuqda iyo Waajibaadka Xubnaha ugu yaraan sannadkii.
- Samee tallooyin soo jeedi ku saabsan xuquuqdaada iyo masuuliyadaha sidii xubinta Molina Healthcare.
- Hel liiska lambarrada taleefanka dhibaatada.
- Hel caawinaad buuxinta foomamka dardaarancka hore ee maskaxda ama caafimaadka.

## Waajibaadkaaga

Sidii qof diiwaan gashan, waxaad aqbalaysaa:

- Inaad kala hadasho adeeg bixiyayaashaada waxa ku saabsan caafimaadkaaga iyo baahiyahaaga daryeelka caafimaadka.
- Inaad ka caawiso gaadhida go'aanada ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka, ay ku jiraan diidista daawaynta.
- Inaad garato dhibaatooyinkaaga caafimaad kana qayb qaado yoolalka daaweynta ee lagu heshiiyey sida ugu macquulsan.
- Sii adeeg bixiyayaasha Molina Healthcare si loo dhammaystiro maclumaadka ku saabsan caafimaadkaaga.
- Raac tilmaamaha adeeg bixiyahaaga ee daryeelka aad ogolaatay.
- Ilaali ballamaha oo wakhti buure ah kaalay. Wac xafiiska bixiyahaaga haddii aad daahsanayso ama haddii ay tahay inaad baajiso ballanta.
- Sii adeeg bixiyeyaashaada maclumaadka ay ugu baahan yihiin si loo bixiyo lacagaha adeegyada ay adiga kuu fidyaan.
- Soo qaado kaadhkaaga adeegyada ProviderOne iyo kaadhka xubinta aqoonsiga Molina Healthcare dhammaan ballamahaaga.
- Wax ka baro qorshahaaga caafimaad iyo adeegyada la daboolay.
- Iisticmaal adeegyada daryeelka caafimaadka marka aad u baahan tahay.

- U isticmaal adeegyada daryeelka caafimaadka si habboon. Haddii aanad samayn sidaas, waxaad lagaa diiwaan geli karaan Dib u eegida Bukaanka iyo Barnaamijka Isku xidhka. Barnaamijkan, waxaad laguu qoondeeyay hal PCP, hal farmasii, hal dawo qoraha maadooyinka la xakameeyo, iyo hal cusbitaal daryeelka aan gurmadka ahayn. Waa inaad ku jirtaa qorshe isku mid ah ugu yaraan 12 bilood.
- Ku wargeli HCA haddii cabbirka qoyska ama xaalada isbeddesho, sida uurka, dhalashada, korsashada ilmo, beddelka cinwaanka, ama aad qalanto Medicare ama caymis kale.
- Cusbooneysi caymiskaaga sanad walba adoo adeegsanaya Washington Healthplanfinder [wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org), oo ka soo warbixi isbeddellada ku dhaca koontadaada sida dakhliga, xaaladda guurka, dhalashada, korsashada, cinwaanka isbeddelada, iyo u-qalmitaanka Medicare ama caymis kale.

## Dardaaranka hore

### Waa maxay dardaaranka hore?

Dardaaranka hore wuxuu ku dhigayaa doorashadaada daryeelka caafimaadka qoraal. Dardaaranka hore wuxuu u sheegayaa dhakhtarkaaga iyo qoyska:

- Waa maxay nooca daryeelka caafimaadka ee aad sameyso ama aadan rabin haddii:
- Waxaad miyir beelaysaa.
- In dheeraad ma gaadhi kartid go'aanada caafimaadka.
- Uma sheegi kartid dhakhtarkaaga ama qoyskaaga nooca daryeelka aad rabto.
- Waxaad rabtaa inaad ku deeqdo xubintaada geeridaada kadib.
- Waxaad doonaysaa qof kale inuu go'an ka gaadho ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka haddii aanad karin.

Haysashada dardaaran horudhaca ah waxay ka dhigan tahay kuwa aad jeceshahay ama dhakhtarkaagu kuu samayn karo doorashooyinka caafimaad adiga oo ku salaynaya waxaad rabto. Waxaa jira saddex nooc oo dardaaranno hore ah oo ka jira Gobolka Washington:

- Awoodda adkaysiga leh ee qareenka ee daryeelka caafimaadka Kani wuxuu magacaabayaa qof kale inuu kuu gaadho go'aanno caafimaad haddii aanad awoodin inaad adigu samaysato.
- Daryeelka caafimaadka (dardaaranka marka la nool yahay la sheego) Qoraalkan qoran wuxuu dadka u sheegayaa inaad rabto daaweyn si loo kordhiyo noloshaada.
- Codsiga ku deeqada xubin jidhka ah.

Kala hadal dhakhtarkaaga iyo kuwan adiga kuu dhow. Waxaad tirtiri kartaa dardaaranka hore wakhti kasta. Waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo anaga naga yimid,

dhakhtarkaaga, ama cusbitaalka oo ku sabasan dardaarkan hore. Wuxuu sidoo kale kartaa:

- Weydii inaad aragto xeerarka qorshahaaga caafimaadka ee ku saabsan dardaraanka hore.
- Ku soo xaree cabashada Molina Healthcare ama HCA haddii tilmaantaada aan la raacin.

Foomka Amarka Dhakhtarka ee Dawweynta Joogteynta Nolosha (POLST) waxaa isticmaali kara qof kasta oo qaba xaalad caafimaad oo daran, una baahan in uu go'aanno ka qaato daaweynta joogteynta nolosha. Adeeg bixiyahaaga wuxuu isticmaali karaa foomka POLST si uu u matalo rabitaankaaga si cad iyo amarrada khaaska ah ee caafimaad. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan Dardaarkan Hore nala soo xidhiidh.

## Dardaarkan hore ee caafimaadka maskaxda

### **Waa maxay dardaarkan hore ee caafimaadka maskaxdu?**

Dardaarkan hore ee caafimaadka maskaxdu waa warqad sharchiyeed oo qeexeysa waxa aad rabto in uu dhaco haddii dhibaatooyinka caafimaadkaaga maskax uu noqdo mid aad u daran heer aad dad kale caawimo uga baahato. Tani waxay noqon kartaa marka xukunkaagu xumaado iyo / ama aadan awoodin inaad si hufan ula xiriirto.

Waxay u sheegi kartaa dadka kale daaweynta aad rabto ama aadan rabin, waxayna aqoonsan kartaa qof aad siisay awood uu go'aan kaga gaadho magacaaga.

Haddii aad leedahay dardaaran hore daryeel caafimaad oo horudhac ah waa inaad taas la wadaagtaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka maskaxda si ay u ogaadaan waxaad rabto.

## **Sideen ku buuxiyaa howsha dardaarkan hore caafimaadka maskaxda?**

Waxaad ka heli kartaa nuql ah foomka dardaaran hormaris ah iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo buuxiyo [hca.wa.gov/health-care-services-and-supports/behavioral-health-recoverymental-health-advance-directives](https://hca.wa.gov/health-care-services-and-supports/behavioral-health-recoverymental-health-advance-directives)

Molina Healthcare, adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka dabeeecadda, ama U doodahaaga Caafimaadka Dhaqanka ayaa sidoo kale kaa caawin kara buuxinta foomka. Nala soo xidhiidh si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

## **Ka hortagga khiyaamada, khasaarah, iyo xad gudubka**

Marka Khiyaanada, Qashinka iyo Xadgudubku aan wax laga qaban waxay lumisaa doolarka cashuur bixiye. Doolarkan waxaa loo adeegsan karaa daboolida faa'iidooyinka muhiimka ah iyo adeegyada Apple Health iyo adeegyada bulshada dhixdeeda. Marka aad isdiwaangeliso

waxaad ku jirtaa meel gooni ah si aad u aqoonsato dhaqamada been abuurka ah ama qashinka ah. Haddii aad aragto mid ka mid ah kuwan soo socda, fadlan na ogaysii:

- Haddii uu qof ku siiyo lacag ama alaab beddelka kaarka adeegyada ProviderOne ama haddii lagu siiyo lacag ama alaab beddelka tegida ballan caafimaad.
- Wuxuu aad heshay sharraxaad dheefaha badeecadaha ama adeegyada aanad helin.
- Haddii aad og tahay qof inuu ka been sheegay sheegashada dheefaha.
- Dhaqan kasta oo kale oo aad ku baraarugto oo umuuqda khiyaano, xadgudub ama qashin.

### **Waxaad ka warbixin kartaa khiyaamada ama addoon magacaaga bixin:**

Molina Health Compliance AlertLine

- Khadka Taleefanka ee bilaashka ah: 1-866-606-3889
- Onlayn: [MolinaHealthcareAlertLine.com](http://MolinaHealthcareAlertLine.com)

Adeegyada Xubinta Daryeelka Caafimaadka ee Molina

- Khadka Taleefanka ee bilaashka ah: 1-800-869-7165 (TTY 711)

Sarkaalka Xafiiska U hogaansanka ee Molina Health

Molina Healthcare of Washington  
Attn: Compliance Officer  
P.O. Box 4004  
Bothell, WA 98041-4004

Booqo websaydka Kahortagga Khiyaamada HCA wixii macluumaad dheeraad ah:  
[hca.wa.gov/about-hca/otheradministrative-activities/fraud-prevention](http://hca.wa.gov/about-hca/otheradministrative-activities/fraud-prevention).

### **Waxaan ilaalinaa sirtaada**

Waxaa nalaga rabaa sharcigu inaan ilaalino macluumaadkaaga caafimaad oo aan si qarsoon u hayno. Waxaan u isticmaalnaa oo wadaagnaa macluumaadkaaga si aan u bixino dheefaha u fulino daaweyn, lacag bixin, iyo hawl galada daryeelka caafimaadka. Waxaanu sidoo kale u wadaagnaa oo u isticmaalaan macluumaadkaaga sababo kale sida la oggolaadaaya oo uu sharcigu u baahan yahay.

Macluumaadka Caafimaad ee Xafidan (PHI) wuxuu yahay macluumaadka caafimaad sida diiwaanka caafimaad ay ku jiraan magacaaga, lambarkaaga xubinnimada ama aqoonsiga kale ee ay isticmaalaan ama wadaagaan ceymiska caafimaad. Qorshayaasha caafimaadka iyo HCA waxay wadaagaan PHI sababahan soo socda:

- **Daawaynta** — Waxaa ku jira gudbinta u dhaxaysa PCP gaaga iyo adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimadka kale.

- **Lacag bixinta** — Waxaan isticmaali karnaa ama wadaagnaa PHI si loo gaadho go'aamada lacag bixinta. Tan waxa ku jiri kara sheegashooyinka, oggolaanshaha daawaynta, iyo go'aannada ku saabsan baahiyaha caafimaadka.
- **Hawlgallada daryeelka caafimaadka** — Waxa laga yaabaa in aan u isticmaalno macluumaadka sheegashadaada si aan kuu ogeysiino barnaamij caafimaad oo ku caawin kara.

Waxaan u isticmaali karnaa ama wadaagi karnaa PHI-gaaga adiga oo aan ka helin oggolaansho qoraal ah xaaladaha qaarkood:

- Shaacinta macluumaadkaaga PHI xubnaha qoyska, qaraabada kale iyo asxaabtaada soke ayaa la oggol yahay haddii:
  - Macluumaadku wuxuu si toos ah ula xiriiraa qoyska ama saaxiibku inuu ku lug yeesho daryeelkaaga ama bixinta daryeelkaas; oo aad afka ahaan ku ogolaatay shaacinta ama lagu siiyay fursad aad ku diidid oo aadan diidin.
- Tani waxay oggolaataa HCA ama Molina Healthcare inay isticmaasho oo wadaagto PHI gaaga asbaabahan soo socda awgeed:
  - Marka Xogheyaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Adamiga (DHHS) ee U. S. uu naga rabo inaan wadaagno PHI-gaaga.
  - Caafimaadka iyo Badbaadada Dadweynaha taasoo ay ku jiri karto caawinta wakaaladaha caafimaadka dadweynaha si ay uga hortagaan ama u xakameeyaan cudurka.
  - Hay'adaha dawladu waxay u baahan karaan PHI-gaaga xisaab xidhka ama hawlo gaar ah, sida hawlaha amniga qaranka.
  - Cilmi baadhida xaaladaha qaarkood, marka ay ansixiyaan sirta ama guddiga dib u eegista hay'adaha.
  - Wixii ah dacwadaha sharciga ah, sida ka jawaabista amar maxkamadeed. PHI-gaaga waxa kale oo laga yaabaa in lala wadaago agaasimayaasha aaska ama dembiilayaasha si ay uga caawiyaan inay shaqadooda qabsadaan.
  - Hay'adaha fulinta sharciga si ay uga caawiyaan helitaanka tuhmane, markhaati, ama qof maqan. PHI-gaaga sidoo kale waxaa lala wadaagi karaa maamulada kale ee sharciga ah haddii aan aaminsanahay in aad tahay dhibane xadgudub, dayacaad, ama rabshad guri.
  - In la adeeco sharciyada Magdhawga Shaqaalaha.

Ogolaanshahaaga qoran ayaa loo baahan yahay dhammaan sababaha kale ee aan kor lagu xusin dartood. Waxaa laga yaabaa inaad tirtirto oggolaanshaha qoran ee aad na siisay. Si kastaba ha noqotee, joojintaada laguma dabaqi doono talaabooyinka la qaaday ka hor inta aan la sameyn kansal gareynta.

Waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegto oo aad hesho koobiga Macluumaadkaaga Caafimaadka Ilaalishan (PHI) ee aanu hayno anagu. Tan waxa ku jiri kara diiwaanada loo isticmaalo samaynta sheegashooyinka daboolida iyo go'aamada kale ee xubinta Molina Healthcare. Waxaad u baahan doontaa inaad ku codsato qoraal ahaan. Waxaad isticmaali

kartaa foomka Molina Healthcare si aad ugu codsato. Xaaladaha gaarka ah, waxaanu diidi karnaa codsiga.

## Fiiro Muhiim ah

**Ma hayno koobiyo dhammaystiran oo diiwaankaaga caafimaadka ah. Haddii aad rabto inaad eegto, hesho nuqul ama beddesho diiwaannadaada caafimaad, fadlan la xidhiidh dhakhtarkaaga ama rugtaada.**

**Haddii aad rumeysan tahay inaan ku xadgudubnay xuquuqdaada ilaalinta macluumaadkaaga PHI, waxaad sameyn kartaa:**

- Na soo wac oo soo xaree cabashada. Kaama qaadi doono wax tallaabo oo adiga kugu lid ah inaad cabasho gudbisay awgeed. Daryeelka aad hesho sinaba uma beddeli doono.
- Ku soo xaree cabashada US DHHS, Office for Civil Rights at: [ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf](http://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf), ama u qor:

U.S. Department of Health and Human Services  
200 Independence Ave SW, Room 509F, HHH Building  
Washington, DC 20201

Ama:

Wac 1-800-368-1019 (TDD 1-800-537-7697)

**FIIRO GAAR AH:** Macluumaadkani waa dulmar keliya. Waxaa nalooga baahan yahay inaan ka dhigno PHI-gaaga mid gaar ah oo aan ku siino macluumaad qoran sanadkiiba oo ku saabsan qorshooyinka ku dhaqanka sharciga ilaalinta sirta iyo PHI-gaaga. Fadlan tixraac Ogeysiiska Hababka Qarsoonnimada wixii faahfaahin dheeraad ah. Waxa kale oo aad nagala soo xidhiidhi kartaa 1-800-869-7165 (TTY 711), PO Box 4004, Bothell, WA 98041-4004, ama noogu soo dir e-mailka at [MHWMemberServicesWeb@MolinaHealthcare.com](mailto:MHWMemberServicesWeb@MolinaHealthcare.com) wixii macluumaad dheeraad ah.

